SIDEE UGA GUDBI KARTAA

Caqabadaha Guusha kaa hor Taagan



Cabdifitaax M. Ducaale [Cajab]

TUSMADA

Ereyada akhristayaasha buuga. 8

Mahad cellin 10

Hor dhac. 11

Safarkii baadi goob. 12

Maku guulaysatay baadi goobkaagii? 15

Mawduuca buuggan uu ku saabsan yahay. 16

CAQABADAHA GUUSHA OO KOOBAN....17

CAQAABADA 1AAD. 18

HADAF LA'AAN....18

AHMIYADA AY LEEDAHAY INUU QOFKU HIIGSI YEESHO....20

Talaabooyinka jaangoynta hiigsiyada. 23

Caqabada 2aad. 33

Qorshe la'aan 33

Caqabada 3aad 47

Isku dheeli tir la'aanta nolosha. 47

Caqabada 4aad. 57

Maarayn la'aanta waqtiga....57

Caqabada 5aad. 64

Aaminaada gurracan (taban). 64

Caqabada 6aad. 75

Caqaaabada 7aad. 79

Curyaamiyaasha(hanjabiyaasha)....79

Caqabada 8aad. 82

Wanaag saadsiga (Optimism) iyo xumaan saadsiga (Pessimism)....82

Calaacalkii dalka Soomaaliya....84

Biya dhaca buugga....88

Codasi! 90

Tixraac buuga. 91

SIDEED CAQABADOOD OO GUUSHA KAA HORTAAGAN

Qore

Cabdifataax Maxamuud Ducaale

(Cajab)

Copyright © 2018 by Cabdifataax Maxamuud Ducaale

" Cajab "

All rights Reserved No part of this book may be reproduced in any form or by any means, eletronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system,without written permission from the Copyright owner.

“Buuggan waxbalagama baddali karo, lama badin karo, lamana min guurin karo, iyadoon ogalaanshiyo laga haysan qoraaga buugga”.

All questions and comments should be directed to: Author

Garoowe.
cajab2@hotmail.com., cajab100@gmail.com.
Facebook :- cajab2@hotmail.com.

Talefan :+252907061362

daabacaddii: 4aad
bogaga: 161
luuqadda: Somali

بسم الله الرحمن الرحيم

EREYADA AKHRISTAYAASHA BUUGA.

Buugaani waa mid saamayn dhab ah ku leh bulshada Soomaaliyeed, gaar ahaan dhallin yarada dalku u baahan yahay hormarrintooda

Waa buug laga dheehan karo isbeddel iyo han sare, hormarkaagu wuxuu ku jiraa gacantaada

“Ninkii timir abuuriyo …. Ninkii tiin tallaalaba

Taariikhdu waa werin”. Yamyam.

Cismaan Maxamuud Yuusuf: - Qoraha Buugga Qaxar iyo Qaxooti.

Akhristaha 2aad.

Waa kitaab aad u qiimo badan, kuguna abuuraya himilo iyo himmad sare. Waa mid mudan in la akhriyo, lana hadlaya naftaada, si aad heeryada gaabiska iskaga gedisid. Wuxuu qoraagu ku soo ururiyay sheekooyin, dhacdooyin iyo dhambaallo tilmaamaya sidaad u hormarin lahayd naftaada, hadafkaagana u hiigsan lahayd.

Cabdicasiis Calas Cartan.

Akhristaha 3aad

Dadka inta guullaysata iyo inta guul darraysataa waxa ay ku kala duwan yihiin keliya waa qorsheha ay dejisteen, yoolka ay mala'awaasheen iyo hannaanka ay u qeexeen yoolkooda.

Nin dariiq xariiqdaa ::::: Garan kara dayawgee
Dhidarkii ku kacay danab::::::Doc kastaaba waa u toos.

Abwaan Gaariye (ALHUN).

Yool waa jaangooyaha guusha. Waa cabir guulleed lagu qiyaasi karo qof, umadd, shirkad iyo urur guullaystay. Meeshii ay ka yimaadeen waa bilowgii yoolka "Qorsheynta yoolka" halka ay soo gaareenna waa yoolka laftiisii (Yool) intaa u dhaxaysaana waa jidkii ay yoolka usoo mareen. "Jidkii yoolka".

Haddaba akhriste wuxuu buuggani kuu fududaynayaa in aad ka mid noqoto dadka inta guullaysatay. Wuxuu kaa badbaadinayaa in aad ku biirto dadka inta nolosha ka dhacday. Wuxuu ku tusayaa caqabad kaste oo guushaas kaa hor istaagi karta iyo weliba sidii aad uga boodi lahayd. Akhriste ku dedaal in aad adigu noqoto qofkaas guusha la la jeclaaday.

Abwaan Axmed khaliif Maxamed.

Akhristaha 4aad.

Waa buug xambaarsan xog muhiim ah oo qofkii si qoto dheer u dhugta ay nolashiisa wax iskabaddali doonaan. Sidoo kale qoraaga buuggu waa mid leh waayo aragnimada waxa uu buuggu kahadlaayo isla markaanna leh aqoonteeda. Wuxuu tobabaro iyo muxaadirooyinba uu ku bixiyaa cilmiga Kobcinta awoodaha Bini'aadanka. Sidaa daraadeed buuggani waa mid ka mid ah natiijooyinkii ka soo baxay waayaarag nimadaas. Wuxuuna ugu talagalay dadka intii aan nasiib u helin in ay si toosa qoraaga uga faa'iideystaan, in ay kadaalacan karaan cilmigaas buuggan iyo kuwa kale ee la midka ahba. Waxa muhiim ah buuggani in uu gaadho goob kasta oo dalka ka mid ah, lana dhigo dhammaan maktabadaha, silooga wada faa'iideysto….

Ibraahin Aw-Xasan Ismaaciil (Waaberi).

Qoraaga Buugga- Irridaha Farxadda.

MAHAD CELLIN

Anigoo ka anbaqadaya xadiiskii Nabiga uu yiri: -

عن أبي هريرة مرفوعا:- ((لا يشكر الله من لا يشكر الناس)) . وهو حديث صحيح صححه الألباني .

((Alle uma mahad celin qofkaan dadka u mahad celin)).

Ayaan halkan ugu mahad celinayaa asxaabtayda qaaliga ah iyo culimadeena, aqoon yahankeena aan igala bakhaylin inay isiiyaan talooyin wanaagsan intaan qorayay kitaabka waliba talooyinkooda intooda badan waan qaatay, kitaabkana waan ku qoray asxaabtaas aad iyo aad ayay u badan yihiin, laakiin waxaan isku dayayaa in aan dhowr ka magacaabo

Sheekh Fu’aad Maxamuud xaaji Nuur.

Cabdicasis Calas Cartan.

Ibraahin Aw-Xasan Ismaaciil (Waaberi).

Cismaan Maxamuud Yuusuf.

Magacyadooda kuma soo wada koobi karo halkaan asxaabtii igala qeyb qaadatay soo saarida kitaabka, laakiin dhamaantood waxaan leeyahay waad mahad-santihiin, dhiiri gelintiiniina wax badan ayay i tartay oo aan ka faa’iiday.

HOR DHAC.

Alle ayaa mahad oo dhan u sugnaatay, Nabigeenna Muxamad Naxariis iyo Nabad gelyo Korkiisa ha ahaato.

SAFARKII BAADI GOOB.

Taariikhdu markay ahayd 10/02/2014 ayaan safar uga soo kici timay dalka Masar. Anigoo ku soo jeeda dalkaygii hooyo ee Soomaaliya.

Ula jeedooyinkii aan uga gollahaa safarkayga waxaa kow ka ahaa arrimahan soo socda.

1.Waxaan baadi goobaayay wiil iyo gabar Soomaaliyeed oo leh hiigsi cad iyo qorshe deggan, aaminsan inay yihiin dadka adduunka ugu muhiimsan, isuna arka inay istaahilaan inay ku noolaadaan dalka adduunka ugu quruxda badan.

2.Waxaan jeclaa inaan arko dhallin yaro Soomaaliyeed oo ku tala galay inay dalkooda ka dhigan midka loo soo tahriibo, kaadida loo soo cabbo, barafka Ruushka iyo Yurub u dhaxeeya loo soo jiira, saxaraha Liibiya iyo Jaad u dhaxeeya loo soo maro, bad weynta hindiya loo soo jibaaxo, qof kasta oo adduunkan ku nool uu ku taahayo inuu yimaado Soomaliya, baasaboorkeeda qaato, quruxdeeda ku raaxeysto, shaqana u soo raadsado.

1.Waxaan baadi goobayay wiil iyo gabar Soomaaliyeed oo aaminsan in dalkiisu noqon karo mid gaari kara isku filnaansho xag dhaqaale, aqoon iyo caafimaadba, cod xooggan ku oranaya side dalkaygu u dib dhici karaa Aniga oo nool? sidee dalkaygu astaan ugu noqon karaa musuqmaasuqa, aqoon la'aanta, dhaqaala xumada, maamul xumada …. aniga oo nool? sidee dalkayga intaas oo sano dawlad la'aan u noqonayaa …. aniga oo nool? sidee dalkaygu u noqonayaa midka laga tahriibo, laga cararo…. aniga oo nool? sidee waxbarashada dalkayga hoos ugu dhici kartaa…. aniga oo nool? sidee dalkaygu astaan ugu noqon karaa cafimaad darro, nadaafad darro, waddooyin jajaban…. aniga oo nool? sidee dalkaygu u noqon karaa midka tusaale loo soo qaato mar kasta oo laga hadlaayo dib dhac, burbur, dawlad la'aan, burcad badeed, abaaro iyo gaajo. aniga oo nool?

2.Waxaan baafinaayay bulsho Soomaaliyeed oo ka dhiidhinaaya inaanay adduunkan siyaado ku noqone ee ay wax ku soo siyaadiyaan.

3.Waxaan baadi goobaayay wiil iyo gabar Soomaaliyeed oo hal ku dhigoodu yahay, haddii wiil reer galbeeda dhistay dal qurux badan anna dalkayga waan qurxin karaa? Haddii wiil reer galbeeda yiri dayaxa ayaan tagey oo calankayga ka taagtey, anna waan tagi karaa calankaygana waan ka taagi karaa, haddii wiil reer galbeeda sameeyay diyaarado cirka duullaaya anna waan samayn karaa, haddii wiil reer galbeeda dayax gacmeedyo hawada u dirsadey anna waan u diri karaa?

4.Waxaan baadi goobaayay wiil iyo gabar Soomaaliyeed oo hal ku dhig ka dhigtay wixii dhiggeyga usuurtagal ah anna waa ii suurtagal, wixii bini aadan sameeyay anna waan samayn karaa.

5.Waxaan baadi goobaayay wiil iyo gabar Soomaaliyeed oo ku tala galay in magacooda biya dahab ah lagu qoro.

6.Waxaan baadi goobaayay wiil iyo gabar Soomaaliyeed oo ku tala galay inaanay isku mid noqon maalintii ay dhasheen iyo maalintey dhimanayaan, taasna waxaan ula jeedaa maalinta uu qofku dhalanaayo dad aad u kooban ayaa ogaada dhalashadooda, haddaba qofku hadduu naftiisa hormariyo taariikhdana meel wanaagsan ka galo waxaa hubaal ah in markuu dhimanaayo aanu noqonayn sidii maalintu dhalanaayay, dadka geeridiisa ogaanayaa waa ka badanayaan dadkii dhalashadiisa ogaa, dadka aaskiisa ka soo qeyb galayna wey ka badanayaan kuwii ka soo qayb galay dhalashadiisa.

Dhanka kale haddii aanu qofku naftiisa horumarrin waxey noqonaysaa inay is le kaadaan intii ogeyd maalintuu dhashay iyo intii ogaatey maalintuu dhintey.

Haddaan dhiman lahaa masaas ayaan adduunka kaga tagi lahaa ! oraahdaan waxey ahayd hadal uu yiri wiil dhallin yara ah oo maalin soo qaatay wargeys, markuu damcay inuu akhristo wargeyskii ayaa bogga lagu qoro dadka dhintay ishiisu ku dhacdey, si lama filaan ah ayaa ishiisu ku dhacdey magiciisii oo sadexan oo ku yaal bogga tacsida, wuxuu leeyahay wiilkan, lama yaabin in aan dhimanaayo oo geeridu waa xaq, sidoo kale lama ashqaraarrin in qof kale aan magaca wadaagi karno oo laygu khaldey, ee waxaan is weydiiyay hadeyba maanta run ahaan lahayd oo aad dhiman lahayd, ma saas ayaad adduunka uga tagi lahayd. Ma adiga aan lagu tabeyn ayaad adduunka katagi lahayd? Ma adiga ay isku mid tahay inaad dhimato iyo in aad noolaato, miyaad adduunka kategi lahayd? Qof ku tabay majiro, fongor(dalool) aad daboolaysay oo banaanaatey ma jirto miyaa?

Akhriste, dad badan ayaa ah sida wiilkan oo kale. Waa isku mid markay dhalanaayeen iyo markay dhimanayaanba. Intii taqaaney uun baa taqaana, intii ogeyd uunbaa og, wax u

siyaadey majiro, halkii maalintuu dhalanaayay joogey ayuu haddana joogaa, gu iyo da’ ayaa u korartay.

Baadi goobkii waxaan isku maray gobolo badan oo Soomaaliya ka mid ah. Magaalooyinkii aan maray waxaa ka mid aha

1.Muqdisho

2.Hargeysa.

3.Boorame.

4.Garoowe.

5.Qardho.

6.Boosaaso.

7.Gaalkacayo.

8.Lascaanood.

Dhammaan magaalooyinkaas waxaan kula kulmay qeybaha kala duwan oo bulsha weynta Soomaaliyeed ka mid ah sida dhallin yarada, culimada, macalimiinta, aqoon yahanka iyo waalidiinta iwm.

Akhristaha qiimaha badanoow waxaad mooddaa inaad i weydiinaysid oo oranaysid:

MAKU GUULAYSATAY BAADI GOOBKAAGII?

Akhriste, waxaan kuugu bishaaraynayaa in aan ku guulaystay baadi goobkii aan ku jirey oo aan helay wiilkii iyo gabadhii Soomaaliyeed. Magaalo kasta oo aan tagana waxaan la kulmaayey dhallin yaro Soomaaliyeed oo aad u jecel dalkooda, ka gubanaaya dib u dhaca ku yimi dalkooda, jecel inay dalkooda ka dhigaan midka adduunka ugu horumarsan.

Si kastaba ha ahaatee waxaan safarkaygii soo gaba gabeeyey taariikhdu markii ahayd 23/04/2014, Waxaan magaalada Hargeysa ka soo raacay diyaarad uu leeyahay dalka aan deriska nahay ee Itoobiya. Aniga ku soo laabtey dalka Masar oo waxbarasho iiga socotay markii horena aan safarkayga ka soo bilaabay, muddo gaaraysa ilaa 6 saac ayaan ku hakadey dalka Itoobiya. Diyaaraddii aan la socdey ayaa waxey igeysay Hotel aad u qurux badan oo magiciisa la yiraahdo (Empire Hotel).

Markii aan salaaddii Duhur iyo middii Casar jamciyay (isku daray) oo halkaas ku tukadey ayaan is iri wax yar seexo, laakiin indhihii ayaa diidey inay gam’aan, waxaad moodaa in qof i kicinaayo oo ileeyahay ha seexan, waxaa aad u habboon inaad qorto kitaab koobaaya ama ka hadlaaya safarkii aad ku tagtay dalka hooyo. Kac oo Qalinka qaado, qor Buug sahay u noqda wiilkaas iyo gabadhaas Soomaaliyeed ee hiigsanaaya inay ka mid noqdaan guulaystayaasha adduun iyo aakhriba. Qor Buug aad ku soo koobayso caqabadaha curyaamiyay hal doorkii Soomaaliya, qor Buug daaha ka qaadaaya waxyaalaha caqabada ku noqon kara qof kasta oo Soomaaliyeed oo raba inuu naftiisa iyo dalkiisaba horumariyo.

Markaas ayaan Qalinka la boodey oo bilaabay qoridda Buuggan aan ugu tala galay in aan kaga hadlo caqabadaha inaka hortaagan in aan noqono dad jira, qiimo leh, istaahila inay ku noolaadaan dalka adduunka ugu wanaagsan.

MAWDUUCA BUUGGAN UU KU SAABSAN YAHAY.

Marka guusha laga hadlaayo dhinacyo badan ayaa laga fiiriyaa, dhinacyadaasna waxaa ka mid ah:

1.Mar waxaa laga hadlaa dhanka xeerarka guushu ay leedahay.

2.Mar waxaa laga hadlaa furayaasha guusha.

3.Mar waxaa laga hadlaa caqabadaha hortaagan guusha.

Haddaba, buuggan waxaan kaga hadli doonaa qodobka ugu dambeeya oo ah **“Caqabadaha hortaagan guusha”.**

Haddii aad si xeel dheer u fiiriso caqabadahaas, waxaa kuu soo baxaya inay aad u badan yihiin hal buugna aan lagu soo koobi karrin. Sidaas awgeed, waxaan ka doortay caqabadahaas badan sideed ka mid ah oo aan u arkay inay yihiin kuwa ugu waaweyn ee ka hortaagan qofka Soomaaliga ah inuu gaaro heerka ay gaareen asaagiis, inuu u fikiro sida ay u fikiraan dadka horumaray, inuu u dhaqmo sida ay u dhaqmaan dadka guulaystayaasha ah.

CAQABADAHA GUUSHA OO KOOBAN.

Akhriste, iga gudoon caqabadihii oo kooban waa kuwane.

1.Hadaf la’aan.

2.Qorshe la’aan.

3.Dheelitir la’aanta nolosha.

4.Maarayn la’aanta waqtiga.

5.Aaminaadda gurracan (taban).

6.Duruufta iyo ku marmarsiyeedkeeda.

7.Curyaamiyeyaasha (hanjabiyayaasha) iyo dhibaatooyinkooda.

8.Xumaan saadsiga iyo hididiilo la’aan.

CAQAABADA 1AAD.

HADAF LA’AAN.

Muxuu asaagay u hormaray anna aan u dib dhacay?

Akhristaha qiimaha badanoow, ma dhacdaa inay ku soo maraan habeenno, maalmo, asbuucyo iyo bilo kala duwan oo aad wali adigii tahay waxna aanay kaa iska bedelin? ma dhacdey inaad sanad ka hor aad qimaysay heerka aad joogto ha haato dhanka aqoonta, dhaqaalaha, cibaadada, dhaqan wanaaga iwm, natiijadii kuu soo baxdey intaad meel ku qoratay, maanta oo aad Buuggan akhrinayso qiimayn labaad ma isku samaysay? Maxaa kaa iska baddaley? Ma horumartay mise hoos ayaad u dhacdey? ???

Ma is weydiisay waligaa su'aalahan noocan oo kale ah.

Maxaa asaaggey u hormaray oo aan meeshaydii u taaganahay? Muxuu saaxiibkay u hormaray anna meesha i taagey? Maxaa noloshayda ka dhigey mid isku mid ah, maanta shalay ayay la mid tahay, berrito maanta ayay la mid noqon? Maxaa sababay inaan saas noqdo oo aan talaabo horey ugu qaadi waayo?

Maxaa noloshayda ka dhigey mid ah giraangir wareegeysa oo meeshay shalay taagnayd beritana ku soo laabanaysa?

Akhriste su'aalahaas iyo kuwa la midka ah waxaa keena ama sababa in qofka qabsadaan oo ku habsadaan hal shay oo ah inuu qofku ku noolaado nolol ku astaysan " **hadaf la'aan, ula jeedo la'aan, qorshe la’aan).**

Inay noloshaadu saas noqoto waxaa keenaaya dabar xoog weyn ayaa kugu xiran, dabarkaas oo ah **‘Hiigsi La'aan’**.

Haddii aynaan hadaf yeelan sidee nolosheena noqonaysaa?

Haddii nolosheenu hadaf la’aan noqoto, waxay noqon mid ku astaysan mushkiladba mushkilad hakuu dhiibto, halka dadka noloshoodu ku dhisan tahay yoolal iyo hiigsiyo ay hiigsanaayan ay tahay, fursadba fursad hakuu dhiibto.

Nolosha aan ku qotomin yoolal la hiigsanaayo, waxaa weeye nolol ku tilmaaman jaah wareer aan lahayn meel looga baxo.

SHURUUDDA UU LEEYAHAY YOOLKA AMA HIIGSIGA FIICAN.

1.Yool cad oo aan mugdi iyo humaag ku jirin.

2.Yool go'an oo aan baahsanayn.

3.Yool xanbaarsan himmad iyo himilo sare.

4.Yool la qiyaasi karo inta lagu guulaysan karo iyo inta lagu guul daraysan karo.

5.Waa faqsan diintaada iyo dhaqankaaga suuban.

6.Yool dhaboobi kara, la gaari karo, xaqiiqoobi kara.

7.Yool suurtagal ah oo bini aadan ka dhici kara awoodoodana le'eg.

8.Yool waqti leh oo waqti loo asteeyay lagu soo af meero.

MAXEY YIHIIN WAXYAALAHA II SUURTAGELINAAYA IN AAN KA SALGAARO HIIGSIYADEYDA?

1.Suurayso hadafkaagii oo dhaboobay xaqiiqana noqdey.

2.Diyaar u noqo inaad mas'uuliyadeeda qaado natiija kasta oo ka dhalata hiigsigaaga.

3.Ku adkay hadafkaaga wanaag saadsi ama ka soo qaad inaad gaartayba oo xaqiijisay.

4.U dhaqaaq dhanka hadafkaaga adigoo uu kaa buuxo iimaan iyo aaminaad aad aaminsan tahay ahmiyada uu leeyahay hadafkaan aad hiigsanayso.

5.Maalin walba talaabo horey u qaad aad uga golleedahay inaad u dhowaato ka salgaarida hadafkaaga.

AHMIYADA AY LEEDAHAY INUU QOFKU HIIGSI YEESHO.

Waxaan ku soo koobi karnaa sadex ahmiyadood oo kala ah:

1.Xakameenta nafta.

2.Kalsoonida nafta.

3.Ku raaxaysiga nolosha.

Xakameenta nafta:

Waxey ka dhigan tahay inaad leedahay qorshe degan, barnaamij nidaamsan, isu dheeli tiran oo sabab u noqon kara ka salgaarida dhammaan yoolalka qeybaha kala duwan ee noloshaada.

Taas oo kuu fududeynaysa in aad noqoto qof maamuli kara hab dhaqankiisa, awood u leh maaraynta iyo ka gudbida caqabadaha kala duwan ee ku soo food saari kara intaad ku jirto noloshaada adduunyo.

Waxaad ku sifoobaysaa oraahdii uu yiri faylasuufkii caanka ahaa ee Aristool “maxaa ka macaan noloshaa markaad xaqiijiso shay dadka intooda badan u haysteen inay samayntiisu mustaxiil tahay”.

KALSOONIDA NAFTA.

Markaad qorto yoolalkaaga, qorhse isku dheeli tirana aad u dajiso yoolalkaaga, waxaad helaysaa kalsooni kugu xanbaaraysa in aad madax madax u tiinbato xaqiijinta yoolaalkaaga iyo samaynta wax yaalo badan oo dadku la riyaaqaan una bogaan.

Diidmadi ugu caansanayn qarnigii inaka tagey.

Sheekadii (Rosa Parks)

Akhriste, bal sheekada gabadhaan sifiican u dhuux si’ay kuugu cadaato qiimaha ay leedahay in qofku naftiisa ku kalsoonaado,

Rosa waxey ahayd gabar madow ah oo u dhalatay dalka Maraykanka, iyadoo maalin ka soo galab carowdey shaqadeedii kuna sii jeeda gurigeeda ayay waxey soo istaagtay astaanka laga

raaco basaska, markii baskii yimi ayay kortay Rosa iyadoo arrin weyn nafteeda ku qarsatay, baskii kuraastiisii ayay isha la raacdey kadibna waxey aragtay kursi bannaan markaas ayay fariisatay kursigii. Wax yar hadey fadhidey waxaa baskii soo korey nin ah dadka caddaanka ah, wuxuu soo dul istaagey Rosa isagoo sugeya inay uga kacdo kursiga, Rosa dheg uma dhigin danna kama gelin ninkii caddaanka ahaa kursigeedii ayayna ku sii fadhidey, ninkii caddaanka ahaa wuu xanaaqay dhammaanna dadkii caddaanka ahaa ee baska saarnaa ayaa ku qayliyay Rosa uu ku yiri ‘ il biriqsiyo gudahood kaga kac kursiga , una banee boqorkaaga adoon yahay madoow ’ Rosa dheg uma dhigin caydii iyo hanjabaaddii dadkii caddaanka ahaa ee gaariga la saarnaa.

Akhriste, ma kula tahay in baskii la istaajiyay, booliiskana la wacay gabadhii Rosa ahaydna ganaax, dil iyo xabsi la is kugu daray!

Waxaa macquul ah inaad is weydiinayso, maxaa sababay oo loo ganaaxey Rosa? Basku soo dad weynaha kama dhaxeeyo? Maxaa ku jaban inay kursiga ku fariisato maadaama uu banaanaa markay fariisanaysay? Goormaa la arki jirey islaan waayeel ah inay kusri uga kacdo wiil dhallinyaro ah?

Akhriste, si layaab kaasi kaaga ba’o, bal ila akhri xeerka maraykanku wuxuu qoraayay xiligaas:

Ma banaana in qof madow fariisto kursi isagoo uu taagan yahay qof dadka cad ah! haddii wiil dhallin yaro ah oo caddaan ah soo dul istaago haweenay waayeel ah oo madow kursinaku fadhido waa inay sida ugu dhakhsiyaha badan uga kacdaa! haddii kale waxey la kul maysa ganaax iyo ciqaab.

Bal intaas waxaa sii dheeraa inaad ku aragto makhaayadaha waaweyn ee maraykan ku yaalay ‘looma ogola inay soo galaan makhaayada bisadaha, eyga iyo qofka madoow’.

Wax yaalahaas oo is biirsadey ayaa waxey Rosa ku keentay inay ka dhiidhido adoonsigan gurracan ee foolxumada badan ee dadka madawga ah laguhayo.

Waxey qaadan weydey in sidan foosha xun loola dhaqmo, sababtuna ay tahay inay madoowdahay.

Waxaa maskaxdeeda ka dhaadhici waayay in la lasimo xayawaanaadka oo la dhaho qof madoow iyo eey makhaayada masoo geli karo!

Maalintii ay Rosa go'aan ku gaartay inay dhahdo Maya adoonsi, Maya midab takoor, Maya liidnimo, Maya quursi iyo xaqirid, ayaa waxaa bilawdey kacdoonkii dadka maddowga ah ay dhaheen dhammaantood Maya …. Maya …. Maya liidnimo iyo quursi danbe.

Kacdoonkaas wuxu socdey ilaa 381 maalmood, markii raggii caddaanka ahaa ee dalka ka talinaayay u maarawaayeen dajinta kacdoonkan ka kacay dhammaan daafaha waddanka Maraykanka, ayaa maxkamadii u hiilisay Rosa iyo bahdeedii dulmisanayd, halkaasna waxaa ku dhamaadey xeerkii iyo dulmigii lagu hayay dadka madow ee ku nool Maraykanka.

Diidmadii Rosa ayaa waxey keentay in xilligan aan Buuggan qoraayo uu maraykan ka yahay madaxweyne nin madow ah (Barack obama).

Diidmadii Rosa waxey keentay in sanadu markay ahayd 2001 miilaadiga kuna beegnayd 46 guuradii ka soo wareegtay maalintii ay Rosa ay tiri maya dulmi iyo quursi, in gaarigii ay maalintaas ku fariisatay kursigiisa lagu iibsado 492 kun $.

Diidmadii Rosa waxey keentay in kumanaan dad ahi iskugu soo baxaan waddooyinka iyagoo ka qeyb gelaaya aaska iyo janaasada Rosa sanadku markuu ahaa 2005 miilaadiga, iyadoo da'deedu gaartay 92 sano jir.

Diidmadii Rosa waxey keentay in aaskeeda ay ka soo qayb galaan kumanaan barooranaaya, madaxweynayaal, aqoon yahano, in calankii Maraykanka hoos loo dhigo oo la dajiyo, in la dhigo aqalka maydka la dhigo maydka dadka la maamuusaayo, iyadoo la ogsoon yahay in aan aqalkaas la dhigin 30 qof mooyee ilaa laga soo bilaabo 1852 miilaadiga, kumana jirin sodon kaas qof dumar ah.

Diidmadii Rosa waxey keentay inay dhimato iyadoo qoorta ugu jiraan, bilad sharafyo aad u badan.

Akhriste, waad ila dareemaysa qiimaha ay leedahay kalsoonidu iyo meesha ay qofka gaarsiiso.

Akhriste, soo ma joogno xiligeynu dhihi lahayn maya… maya… maya Soomaaliya oo dib dhacda ama astaan u noqota dawladaha faashiliinta ah?

Ku raaxeysiga nolosha.

Inaad leedahay qorshe degan iyo hiigsi cad waxey ka dhigan tahay inay noloshaadu noqoto mid isku dheeli tiran, qeyb walbana xaqeeda hesha, goortaasna aad ku raaxeysato noloshaada si wanaagsan.

Haddii laakiin aadan lahayn waxey ka dhigan tahay inaad ku nooshahay nolol isku dhex yaacsan oo aan nidaamsanayn, nuxurkii iyo raaxadiina ay ka maqan tahay.

TALAABOOYINKA JAANGOYNTA HIIGSIYADA.

Talaabada 1aad

(Ogow heerka aad nolosha ka marayso).

Halkee hada joogaa? Muxuu yahay heerka hada aan ku suganahay? Mustawaha horumarkayga iyo dib dhacaygu halkee jogaa?

Akhriste, qof og heerka uu nolosha ka maraayo ayaa hiigsi jaangoysta, saas awgeed ayaa waxaa la gudboon qofka yoolalkiisa jaangoynaaya in uu is weydiiyo su'aalahaas oo kale, si'uu isku ogaado marxalada iyo heerka uu nolosha ka maraayo.

Sheeko kooban.

Nin ayaa soo wacay saaxiibkiis oo kuyiri: halkee joogtaa aan kuu imaadee? markaas ayuu weydiiyay adi halkee joogtaa si'aan kuugu tilmaamo meeshaan joogo.

Sheekadaan tusaalaha ah waxey muujinaysaa, qof hadduu ku dhaho ii tilmaam meeshaad joogto aan kuu imaadee, su'aasha ugu horeysa ee aad weydiinayso inta aadan u tilmaamin waxey tahay inuu kuu sheego meesha isagu joogo iyo dhinaca uu kaa xigo si'ay kuugu fududaato inaad u tilmaamto meeshaa joogtid.

Taas waxaa la mid ah, qofku ma'ogaan karo meesha uu hiigsanaayo ama uu rabo inuu gaaro mustaqbalka ilaa uu ogaado heerka uu nolosha ka maraayo, mustawaha uu joogo, ha'ahaato dhanka aqoonta, dhaqaalaha, cibaadada iwm.

Haddaba waxaan isku deyayaa in aan akhristaha usoo gudbiyo laba hab ama qaab oo uu qofku ku ogaan karo heerka uu maraayo, labadaas hab waxey kala yihiin, hab ku dhisan su'aalo uu qofku naftiisa weydiinaayo kuna ogaanaayo meesha uu nolosha ka joogo iyo hab is le'eg ah ama (formula) oo looyaqaan "Formula SWOT)".

Habka (qaabka) 1aad.

Habka su’aalaha ku dhisan.

Haddaba waxaan ku hormaraynaa midka su’aalaha ah ee akhriste dhegta ii raarici iskuna dey inaad dhuuxdo su’aalahaas naftaadana aad weydiiso.

Su’aalahan intooda badan waxaan ka soo xigtay, tababar ama muxaadaro uu jeediyay Dr Daariq Suweydaani oo uu u bixiyay **رتب حياتك**.) oo uu yahay macnaheedu kala tartiibi noloshaada, nidaami noloshaada, heerar kala sareeya kalana muhiimsan u kala samay noloshaada.

Su’aasha 1aad

Maxaan u noolahay? muxuu Alle ii abuuray? maxaa adduunkan lay keenay?

Akhriste su’aashan jawaabteeda qofka muslimka ah wey u cadahay oo Alle ayaa kitaabkiisa qur’aanka ku cadeeyay ula jeedka uu u abuuray jinniga iyo aadanahaba wuxuuna yiri “jinniga iyo aadanaha uma abuurin inay i caabudaan mooyaane”.

قال تعالى :- وما خلقت الجنَّ والانس الاّ ليعبدون . سورة الذاريات .

Sidoo kale fahanka ay ka haystaan muslimiintu cibaadada wey ka duwan tahay fahanka ay ka hastaan dadka aan muslimiinta ahayn.

Tusaale reer galbeedku cibaadada waxey u haystaan shay aan soo dhaafin kaniisada ay ku cibaadeystaan maalinta axada ah, wax shuqulna aan ku lahayn nolosha inteeda kale. Laakiin muslimiintu waxey u arkaan cibaadada shay aad u baaxad weyn oo kulansanaaya dhammaan qeybaha nolosha. Haddii aan tusaalayaal soo qaadano ku saabsan sida ay u tahay cibaadadu shay guda weyn oo kulansanaaya dhammaan qeybaha nolosha, suurtagalna ay tahay in qofku noloshiisa u baddalo shay cibado ah oo uu Rabbi ugu dhowaanaayo.

1.Alle oo waxdaaniyadiisa la qiro cibaadadiisana aan cid kale lala wadaajin waa cibaado.

2.Waddada oo qashinka laga qaado waa cibaado hadduu qofku niyaysto.

3.Xishoodku waa cibaado.

4.Ninka oo xaaskiisa u galmoodaa waa cibaado.

5.Ninka oo xaaskiisa afka cuntada u geliya waa cibaado.

6.Hurdada uu qofku seexanaayo waa cibaado haddii u niyaysto inuu ugu xoogsado cibaadada Alle.

7.Qofka oo yaanbadiisa qaata isagoo raadsanaaya irsiq xalaal ah cibaado ayuu ku jiraa.

8.Ninka reerkiisa biilaaya cibaado ayuu ku jiraa.

9.Boqorka caadilka ah waa ahlu janna camalkiisaasna waa mid uu Alle ugu dhowaanaayo.

10.Qaaliga maxkamada jooga cibaado ayuu kujiraa maadaama uu caddaalad ku xukminaayo.

11.Macallinka dadka waxbaraaya cibaado ayuu ku jiraa.

Akhriste intaasi tusaale ayay ahayd waxaana inoo ka soo baxaaya in qofku noloshiisa dhan u badali karo cibaado, keliyah waxaa looga baahan yahay inuu Alle dartiis uu u niyoodo.

Haddaba su’aasha jawaabteeda waxaan ku soo koobi karnaa “waxaan u noolahay in aan Alle raaligeliyo”.

Markay qofka u caddaato su’aashaan jawaabteedu, waxaa la gudboon inuu u gudbo su’aasha ku xigta ee oranaysa.

Su’aasha 2aad

Maxaan ka salgaaray intaan noolaa? maxaa ii hirgalay hiigsiyadii aan rabay in aan xaqiijiyo intaan noolaa?

Akhriste waxaad suuraysataa adigoo 80 sano madax lagalay, kadibna su’aashan is weydii, maxaa ii hirgalay sideetankaas sano ee aan noolaa?

Maxaan ka salgaaray hiigsiyadii aan ku taahaayay in aan gaaro? Raad noocee ah ayaan ka tageyaa noloshayda? Maxey yihiin waxyaalaha lataaban karo ee aan berito Alle la hortagi karo?

Akhriste markale suurayso adigoo Alle cimri dheer kusiiyay, maxaad jeceshahay inaad iska qorto, waxaan ahaa sidaas iyo sidaas, waxaan ahaa qof noocaas ah, Cv noocee ah ayaad iska qoraysaa? Haddii qof kale ay dhacdo inuu taariikh kaa qoro, taariikh noocee ah ayaad jeceshahay in lagaa qoro? Bogga taariikhda bog noocee ah ayaad ka gelaysaa?

Akhriste jawaabta su'aalahan fadlan haysku deyin inaad ka jawaabto hadda, bal u dib dhigo xili aad nolol degan ku jirto, aad joogto meel ku astaysan xasilooni iyo deganaansho, xili maskaxdaadu nadiiftahay ama aanay shay kale ku mashquulsanayn.

Akhriste jawaabta run ka sheeg, waayo cid kaa arkaysa majirto jawaabtaas, inay run noqotana dantaada iyo hormarkaaga ayaa ku jira.

Su'aasha 3aad

Waa maxey kaalintaydu? Maxey tahay fongortaan buuxiyay ee bulshada ka daboolay? Adduunka qofba meel ayuu kaga jiraa ani halkee kaga jiraa? Waa maxey shaqada ugu weyn ee aan is leeyahay labada daaroodba magac iyo maamuus ayaad ku yeelanaysaa? Ma dhici kartaa in aan dhawr majaal ama dhawr kaalin ma buuxin karaa? Kee baan wax soosaar badnaanayaa markaan hal majaal ama hal kaalin ku mitido in aan buuxiyo iyo markaan dhawr majaal ku takhasuso?

Akhriste, su'aalaha noocaanoo kale ah markaad is weydii so, waxaa kuu soo baxeya meeshaa ku fiican tahay ee aad naftaada iyo dalkaagaba hormar ku gaarsiin kartid.

Cilmi baaristu waxey cadeynaysaa in haddii qofku dhawr majaal galo oo ku takhasuso in dadaalka iyo waqtigu kakala yaacaayo, dabadeedna wax soosaar badan aanu yeelan qofka meelo badan ku baahiya caqligiisa iyo dadaalkiisa.

Haddaba waxaan talo ahaan kuu soo jeedin lahaa inaad halmeel xooga saarto, meeshaasna aad ka mira dhaliso.

Akhriste, waxaan rajayn inay kuu cadahay kaalintii iyo fongortii aad buuxin lahayd, waayo waqti kasta oo ku soo mara kuna dhaafa adigoo aan jaan goyn kaalintii aad buuxin lahayd, waa waqti aan oran karno tacab khasaaro ayuu ahaa.

Akhriste ii ogolaw in aan kuu tusaaleeyo qofka aan lahayn hadaf iyo meel uu usocdo, qofka aanay u cadeyn kaalintii uu buuxin lahaa mustaqbalka.

Haddii aad aragto qof waddada maraaya qoraxduna aad u kulushahay, adiguna aad wadato gaari goortaasna aad dhahdo soo fuul gaari aan ku gaarsiiyee meeshaa u socotay, markii uu

gaarigii soo korayna aad weydiisay halkee ku geeyaa? Uu kuugu jawaabo magaranaayo meeshaan u socdo!!! Qofka noocaas oo kale xaalkiisu yahay sidee ayaad ku caawin kartaa? Sow ma dhici karto meeshuu u socdey ee uu rabay inayba ka damayso isaguna uu horey kuusii raacay?

Haddaba sidaas oo kale ayay noqonaysaa qofka aan aqoon kaalinta looga fadhiyo iyo fongorta sugeysa inuu buuxiyo, dadaalkiisii iyo waqtigiisiiba wuu ka lumay managaranaayo meesha uu kaga lumay.

Ereyo mudan in biya dahaba lagu qoro.

1.Akhriste, waxaad tahay qof noo tirsan oo aan sugeyno goorta uu kaalintiisa buuxindoono.

2.Akhriste, ogaw in kaalintaadii banaan tahay oo lagu sugaayo inaad buuxiso.

3.Akhriste, ogaw inaad tahay qof muhiim ah, dadkiisa muhiim u ah, dalkiisa muhiim u ah.

4.Akhriste, ogaw inaaad tahay qof aan laga maarmin, sidee lagaaga maarmaa waxaadba tahay laf dhabartii hormarka dalkiisa iyo dadkiisaba.

5.Akhriste, waxaan u baahanahay xoogaaga, caqligaaga, garaadkaaga, taladaada iyo dhammaan nimcooyinka Alle kugu minaystay ee fadlan meel dheer hanagala aadin.

Akhriste, wali waxaan ku jirnaa su’aalihii aan oga golahayn inaad is xog ogaato, si’aad bal u ogaato meeshaa marayso iyo halka aad nolosha ka gaartay, haddaba fadlan ila soco oo hayga harrin si’aynu gunta iyo biya dhaca su’aalahan u gaarno, taasoo ah “inaad yeelato qorshe degan, hiigsi cad iyo aragti dheer”.

Su’aasha 4aad

Akhriste, maxey yihiin mashaariicda aad ilaa hadda ka sal gaartay intaad noolayd? Maxaa kuu qabsoomay oo aad kow iyo labo dhihi kartaa? Haddii adigoo dhawr boqol oo qof dhex fadhiya lagu weydiin lahaa “maxaa kuu qabsoomay intaad noolayd?” matahay mid ku farxilahaa su’aashaas mise qajilaad iyo waji gabax ayaad dareemilahayd, awood maw yeelan lahayd inaad qalinka iyo buuga qaadato oo tiriso waxyaalihii kuu qabsoomay intaad noolayd.

Haddaba bal ila akhri sheekadaan uu soo guurinaayo Dr Daariq suweydaani, wuxuu yiri dad gaaraaya ilaa 200 qof ayaan su’aashaan soo dhex dhegey “ qofkii haya sadex shay ama ka badan oo uu ka salgaaray gacanta hataago ” wuxuu yiri dhawr qof ayaa gacanta taagey, kadib ayaan weydiiyay “ qofkii ku faraxsan ama u arka waxyaalahaas uu ka salgaaray inay yihiin shay lagu faani karo yaanay gacanta dajin ”, akhriste maxaad u malaynaysaa inay noqdeen intii gacanta u taagtay inay ku faraxsan yihiin wax u qabsoomay ? waxey noqdeen 7 ruux !!! hadde dadka uu weydiiyay ogaw waa dadka faraha lagu fiiqo oo loo arko inay yihiin aqoon yahaniinta ama wax garadka bulshada.

Sidee ayuu xaalku noqonayaa haddii su’aashaas la soo dhex dhigo bulshada caadiga ah?

Akhriste, waxaan filayaa inaad ila dareemayso inay noloshu macaan tahay markaad ku faraxsantahay ama aad raali ka tahey waxyaalaha kuu qabsoomay.

Akhriste bal ila dhuux xadiiskan qiimaha badan ee suubanuhu (NNKH) markii la weydiiyay su’aashan “ka waran qofku hadduu sameeyo camal wanaagsan oo ay dadku ku amaanaan?”, bal u fiirso jawaabta uu bixiyay suubanuhu “taasi waa bishaaro Alle u soo hormariyay mu’minka”.

سئل رسول الله صلى الله عليه وسلم : أرأيت الرجل يعمل العمل من الخير ، ويحمده الناس عليه ؟ قال : تلك عاجل بشرى المؤمن . رواه مسلم

Bal intaas waxaa sii dheer inuu Nabigu yiri “haddii wanaagaaguna ku farax geliyo xumaan taaduna ku murug geliso mu’min ayaad tahay”.

وقال عليه الصلاة والسلام : إذا سرّتك حسنتك وساءتك سيئتك فأنت مؤمن . رواه الإمام أحمد .

Taas waxaan uga goleeyahay, qofka wanaagsani waa midka habeenkii markuu sariirta tago naftiisa weydiiya, maxaa manta kuu qabsoomay maxaanse kuu qabsoomin? Maxaa kuu hirgalay maxaanse kuu hirgelin? Maku faraxsanahay waxaad qabatay mise kuma faraxsani? Intii lagaarabay miyaad ka gaabisay mise waad dhodhoweysay?

Akhriste bal biya dhaca sheekada ninka la yiraahdo **Steven Paul Jobs** ila dhux si'aad u fahanto muhiimada weyn ee ay xanbaarsan tahay su'aasha ah *"maxaa kuu qabsoomay intaad noolayd?"*.

Steven Paul Jobs.

Dadka qaarkiis waxey ku tilmaamaan inuu yahay hal abuure adduunka wax badan ka badalay, qaar kalena waxey ku tilmaamaan inuu ahaa ninka xiligiisii ugu guusha badnaa, dadka intooda bandanna waxey u yaqaaniin inuu ahaa maamulihii shirkada "APPLE".

Steven Paul Jobs wuxuu haystay markuu jirey 23 1,000,000 $. 24 sano markuu jireyna wuxuu haystay 10,000,000 $. Markuu jiray 25 sano wuxuu haystay 100,000,000.

Si kastaba ha'aatee Steven Paul Jobs wuxuu geeriyoodey sanadii 2011 ee miilaadiga, maalintuu geeriyoodeyna malaayiin dad ah oo adduunka daafihiisa ku nool ayaa waxaa hareereeyay tiiraanyo iyo murug.

Waxaase is weydiin leh, ninkaan muxuu ku mutaystay jacaylka intaas le'eg? Maxaa u suurtageliyay inuu dego qalbiyada kumanaanka u baroortay dhimashadiisii? Waxaan filayaa akhriste inaad laftigaaguba aad dhawrayso in aad ogaato sheekada Steven Paul Jobs! haddaba waatane iga gudoon.

Haddii aan sheekadiisa in badan indha indheeyay, waxan ku soo koobi karaa sababta gaarsiisay heerkaas inay tahay mabda'a uu aaminsanaa oo hal ku dhigiisu ahaa "Muhiima deydu maahan in aan noqdo qofka adduunka ugu dhaqaalaha badan ee waxaa weeye markaan furaashkayga tago habeenkii aan naftayda ugu sheekeeyo, maanta wax fiican ayaad qabatay".

Habka 2aad.

Akhriste, habka labaad ee uu qofku isku ku ogaan karo heerka uu ka maraayo nolosha waxa weeye inuu isticmaalo is le'egta loo yaqaab (SWOT), ereyadaan waxaa loo soo gaabiyay afartan kelmadood eekala ah:

1.Strength. (S) dhinacyada aad ku xoog badan tahay.

2.Weakness. (W) dhinacyada aad ku liidato.

3.Opportunities. (O) fursadaha aad haysato.

4.Threat. (T). caqabadaha ku hortaagan.

Akhriste, si'ay kugu cadaato meelahaa ku liidato iyo meelaha aad ku fiican tahay iyo waliba fursadaha aad haysato fadlan is weydii su'aalahan:

1.Maxey yihiin meelaha aan ku fiicnahay?
……
……

2.Maxey yihiin meelaha aan ku
liito? ……
……

3.Maxey yihiin fursadaha i horyaala ee aan kaga faa'iidaysan karo meelaha aan ku fiicnahay? ……
……

4.Maxey yihiin caqabadaha i hortaagan ee i dhaafinaaya fursadaha isoo maraaya?
……

5.Maxaa keenay in aan meelahaas ku liito?
……

6.Ma jiraa hab ama waddo aan ku daweyn karo kuna soo koobi karo meelaha aan ku liito?
……

7.Imisa masaafo ama (Gap) ayaa u dhaxeysa meesha aan hiigsanaayo iyo meesha aan hadda joogo? ……
……

haddii meelahaa ku fiican tahay iyo fursadaha aad haysato aad u sareeyaan ,,,,, waxey ka dhigan tahay in qorshayaashaadu sareeyaan talaabooyin kaaguna isku dheeli tiran yihiin.

Haddii laakiin meelaha aad ku liidato iyo caqabadaha ay badan yihiin, waxey ka dhigan tahay inaad nolol isku dhex yaacsan ku nooshahay isla markaasna ay kaaga baahan tahay inaad isdabaqabato inta goori goortahay.

Talaabada 2aad

(Jaangoynta hiigsiyadaada).

Akhriste, talaabadii hore waxaan ku soo qaadanay habka qofku ku ogaan karo heerka uu nolosha ka maraayo, talaabadaana waxaynu ku soo qaadanaynaa habka jaangoynta hiigsigaaga adigoo ka dab qaadanaaya talaabadii hore.

Maxaan noqon doonaa mustaqbalka? maxey yihiin yoolalkaan hiigsanaayo mustaqbalka? Halkee hiigsanayaa oo aan rabaa in aan gaaro? Waa maxey yoolalkaan hiigsanaayo? Yoolalkaan hiigsanaayo ma yihiin kuwa waa faqsan mabaadida iyo qiyamkaan u noolahay?

Fiiro gaar ah:

Xeerarka guusha waxaa ka mid ah inuu qofku awood u yeesho jaangoynta yoolalkiisa uu hiigsanaayo.

Reer isbayn ayaa ku maah maaha “haddii aadan taalooyinkaaga hawada ka dhisan meel kalena kama dhisan kartid”.

Taas waxey ka dhigan tahay, haddii aadan aqoon halkee hiigsan waxaad hiigsanayso meel hunga ah.

Akhriste, xasuusnow dadka leh yoolalka wax ku oolka ah, dadka kale yoolalkaasi waxey ugu muuqdaan intaanay dhaboobin mala awaal iyo qarow hurda laga salalay.

Waa maxay shayga ay ka midaysan yihiin guulaystayaashu?

Akhriste, waxaad iga gudoontaa shayga ay ka midaysan yihiin dhammaan dadka guulaystayaasha ah “arrimahooda ayaa ukala nidaamsan, ukala hormarsan, ukala tartiibsan”.

Taasna waa maahmaada ay reer guuraaguna dhahaan “oodi sidey ukala saraysaa lookala guraa”, reer magaalkuna ay dhahaan “canjeelo sidey ukala sarayso ayaa loo cunaa”.

Haddaba sidee ukala hormarrin karaa hawlaha ii yaala? habkee aayaan ukala nidaaamiyaa hawlaha ii yaala? sidee u kala garaanayaa inay hawluhu u kala horeeyaan?

Si kale haddaan u dhigo akhriste su’aalaha waxaan dhihi karnaa

1.Ma saaxiibkaa ayaad soo booqataa mise kitaab kuu kala furnaa ayaad akhrisaa?

2.Ma jimicsi ayaad aadaa mise qur’aanka ayaad akhrisaa?

3.Ma hawsha ii taala ayaan dhameeyaa mise waan yara nastaa?

4.Ma Buuggan ayaan gataa mise lacagta wax kale ayaan ku gataa?

Akhriste, marka su’aalahaas iyo kuwa la midka ah ku soo foodsaaraan waxaad is ticmaashaa jadwalkan uu sameeyay aqoon yahanka la yiraahdo Eisenhower ee loo yaqaan jadwalka kala hormarrinta hawlaha, waana kan habka aad u isticmaalayso jadwalka.

1.1 Shay muhiim ah deg degna ah.sida ballan xiligeedii taagan yahay, cashar xiligiisii taagan yahay.	1.2. Shay muhim ah degdegna aan ahayn. Ballan aan xiligeedii lagaarrin, cashar aan xiligiisii lagaarrin.
1.3 Shay aan muhiim ahayn deg degna ah .sida cayaar xiligeedii soo galay, musalsal xiligiisii taagan yahay.	1.4 Shay aan muhiim ahayn deg degna aan ahayn. Sida inaad qof iska wacdo iyadoo aanay ballan idin ka dhaxeyn wax dan ah oo weyna aadan karabin, inaad cabaar lasheekayso kaliya ayaad rabtaa

CAQABADA 2AAD.

QORSHE LA'AAN

Maxey tahay qorshayn? maxaa loola jeedaa nolol qorshaysan?

Nolol qorshaysan waxey ka dhigan tahay inaad jawaab u hesho su'aashan: -

Sidee ku gaari karaa yoolalkaan hiigsanaayo? maxey yihiin talaabooyinka layga rabo in aan qaado saan u gaaro yoolalkayga?

Su'aashan markaad jawaab u hesho ayaa la dhihi karaa waxaad tahay qof qorshe u degsan yahay noloshiisuna u qorshaysan tahay.

Maw aragtaa in qorshe ladegsadaa ay muhiim tahay faa'iidana leedahay?

Dadka qaarkood markaad la sheekaysato weydiisana su'aashaan (maxaad ka aaminsan tahay inuu qofku qorshe yeesho ?), waxaad arkaysaa dad badan oo kuugu jawaabaaya, anigu ma'aaminsani in qorshe dajin faa'iido weyn noloshayda ku soo kor dhinayso, bal waxaan u arkaa inu waqti lumis tahay, waayo wax badan ayaan ka qeyb galay meelo lagaga hadlaayo ama lays ku tababaraayo habka qorshaha loo dajiyo, wax badana waan isku deyay in aan qorshe degsado, hase yeeshee isku dey yadii waxey ku dhamaateen guul darro iyo waqti lumis.

xageebaad u socotaa?

Akhriste, haddii aysan kuu cadayn kuuna qorshaysnayn meeshaa u socoto, sow mahaboona inaad is weydiiso su'aashan oranaynsa **xageebaad u socotaa?** halkee reer ku furaysaa? xage geedi ku tahay!

Waayo su'aashani waxay xanbaarsan tahay arrin aad u weyn oo loo baahan yahay in qof kastaa is weydiiyo, su'aashaas ayaa waxaa ka dhalanaaya inuu qofku qorshe saMayso yoolna degsado.

Eebbe ayaa 14 qarni ka hor ku soo dajiyay Suubanaheenii (NNKH) ayaad xanbaarsan su'aashaan, Alle wuxuu yiri:

قال تعالى : (فأين تذهبون) سورة التكوير آية 26 .

Rabbi isagoo aadanaha la hadlaaya ayuu ku yiri, halkee u socotaan? Halkee aadeysaan markaad ka tagtaan oo ka leexataan waddadaan idiin jeexey ee Nabi Muxammed idiinku soo

dhiibay? Halkee uga tagteen qur'aanka raacitaankiisa iyo ku dhaqankiisa? Halkee naftiina adduunyo iyo akhiraba uga tagteen?

Waa su'aalo muhiim ah loogana baahan yahay inuu qofku is weydiiyo, waayo Alle inooma abuurin in aan noqono dad iska socda oo aan oqoon meeshay u socdaan.

Sidaas darteed qofka raba inuu ka mid noqdo guuleystayaasha waa inuu is weydiiyaa su'aalahan noocan oo kale ah sida maxey yihiin yoolalka noloshayda? Yoolalkaygu ma yihiin kuwa u kala qaybsan yoolal dhaw iyo kuwa fog? Ma ahay qof diyaar u ah inuu gaaro heerka hadda uu joogo mid ka fiican oo ka sareeya? Diyaar maw ahay in aan ka dhabeeyo hididiilooyinkayga?

Waxaa ah arrin laga naxo in aad aragto dad badan oo aan aqoon meeshay u socdaan, waliba ay ka muuqato sidey u dhaqmayaan inay yihiin dad aan dan ka lahayn una aaba yeelayn inay u arrimiyaan noloshaan isku dhex yaacsan si'ay uga bixi lahaayeen?

Sheeko arrintaas cadeynaysa.

Waxaa jirey laba nin oo shirkad ka shaqayn jirey, shirkadii ayaa u dirtay inay sii hagaajiyaan dabaqa 10aad dhisme ka kooban ilaa 10 dabaq ama biyaano, nimankii markii ay yimaadeen dabaqii ayay arkeen wiishkii ay raaci lahaayeen oo kharaabsan, haddii ay arrintii rogrogeen waxaa usoo baxdey inay qalabkooda tuurta saarsadaan dabaqana koraan oo jaran jarada raacaan, waxey raftaan oo neef tuuraanba dabaqii 10 aad ayay soo gaareen, markaas ayaa mid ka mid ah labadii nin saaxiibkiis ku yiri, waxaan kuu hayaa laba arrimood mid naxdin leh iyo mid farxad leh, mida farxada leh waxey tahay inaynu nabad ku soo gaarnay dabaqii 10 aad, mida naxdinta lena waxey tahay inaanu ahayn dabaqani kii laynoo diray oo aynu khaldanay !. DR Ibraahiim alfiqi ayaa ku qoray kitaabkiisa (xakamee noloshaada).

Sheekadaan waxey astaysay noloshuu tilmaamaayay ninkii carabka ahaa ee gabyayay oo yiri 'waan imi mana aqaano meeshaan ka imi, waddo hortayda ah ayaan arkay markaas ayaan qaadey oo raacay, waxaan ahaanayaa mid waddadaas ku socda waligiis, ama aan diido ama aan ogolaadee kii waddadaas qaada ayaan ahay, maahi mid garanaaya sidee wadadaan ku aragtay, maxaad waddadaan u raacdey? halkee wadadaan ku geynaysaa?'.

Akhriste, waxaan filayaa inaad ila aragtay dad badan oo noocaas oo kale noloshoodu tahay.

Maxaa keena inuu qofku qorshe dajisan waayo?

Asbaab badan ayaa keenta waana kuwan iyagoo kooban.

1.Dadka qaarkood oo aan isuba arag inay yihiin dad mudan inay qorshe degsadaan.

2.Dadka qaarkood waa jecel yihiin inay qorhe yeeshaan waxaase ka maqan habkii ay u dajinlahaayeen qorshohooda.

3.Dadka qaarkood waxeyba u haystaan qorshe dajintaan waqtilumis.

4.Dadka qaarkood cabsi ayaa u diideysa inay qorshe dajistaan.

5.Dadka qaarkood oo jecel nolosha astaanteedu tahay jaantaa furan.

6.Dadka qaarkood waxa caqabad ku ah deegaanka uu ku nool yahay oo u diidaaya inuu qorshe yeesho.

7.Dadka qaarkood waayo arag uma aha habka nolosha loo kala tartiibiyo.

8.Dul qaad la’aan.

Sababta 1aad:

Dadka qaarkood isuma haystaan inay yihiin dad istaahila inay qorshe degsadaan, hiigsi yeeshan, isuma haystaan inay yihiin dad soo qaadan kara warqad cad, qalin far qurux badan dhigaaya, jawi degan oo macaan galaan, geed har qaboow fariistaan, goortaasna ay qodobeeyaan yoolalka ay noloshaan adduunyo hiigsanayaan.

Maxaa keena qofku inuu naftiisa qiimayn waayo? Inuu naftiisa u arki waayo inay tahay midda mudan hormarka? Maxaa keenaaya inuu qofku naftiisa liido?

Maxaa sababaaya in qofku isu arko inuu asaagiis ka hooseeyo ama ka liito?

Akhriste, Arrimo badan ayaa keena in qofku isu arko inuu asaagiis ka hooseeyo ama ka liito, saas awgeedna uusan istaahilin inuu noqdo qof noloshiisu u qorshaysan tahay.

waxaana ka mid ah: -

1.Borogaraamayn hore, waxaa dhici karta in qofka ay soo mareen dhaawacyo halis ah oo nafsi ah ka soo gaaray dadka qofka uu ugu kal soonaan badan yahay sida hooyada ama macallinka, tusaale ahaan haddii hooyadu inta badan ku dhahdo ilamheeda ereyadaan soo socda oo kale, *kaalay waxma tarayahow, kan waan ku khasaaray maxaan u dhalaayay, kuma faraxsanayn in aan uur qaado markaan ilmahan uurkiisa qaadaayay, inaanan uurkiisa qaadin ayaa fiicnaayd iwm.*

Sheeko kooban.

Dr Ibraahim fiqi, ayaa waxaa loo keenay gabar dhallin yaro ah, oo uu ku dhacay cudurka loo yaqaan cuqdad nafsiga, markii uu DR ku waraystay ayay tiri, majiro qof i jecel, dhammaan dadku waa i neceb yihiin, ma jiro qof jecel in aan la fariisto, la joogo ama waqti la qaato, markay gabadhii halkaas marrinayso hadalkeedii ayaa DR ku weydiiyay yaa ula jeedaa oo aan ku jeclayn?

Markaas ayay tiri hooyadey, hooyadey, hooyadey.

Goortaas ayay waxey sii raacsiisay waagaan yaraa ayaa hooyadey si xanaaq ah ii tiri, ani gabdhaha ma jecli, waan ka naxey markaan arkey inaad gabar tahey.

“Haddii marka hooyadeyba i jeclayn oo aanay ku faraxsanayn inay idhashay, yaa kaloo i jeclaanaaya?!”.

1.Inuu qofku qof kale is barbardhigo, waxaan wada ogsoonahay in markuu qofku qof kale is barbardhigaayo uu ka fiirinaayo dhanka qofkaasi kaga fiican yahay isaguna uu kaga liito, halkaas ayaa waxa ka dhalanaysa inuu qofku naftiisa xaqiro ama uu quursado, taasoo keenaysa inuu isu arko inuu yahay qof liita oo aan mudnayn inuu yeesho yool cad, qorshe degan iyo aragti dheer.

Muxuu qofku iskaga daweyn karaa cudurkaan?

Waa inuu go'aan qaato uu ku beddelaayo dhammaan borogaraamadaas ku duuban xasuustiisa ee ka dhigaaya inuu yahay qof liita ama hooseeya, kadibna uu naftiisa ku qanciyo inay waddada hormarku tahay inuu yeesho yool cad, qorshe degan iyo aragti dheer, ugu dambayntiina uu isha ku hayo darajada kowaad iskana ilaawo inay jirto darajo labaad waayo mar haddii uu qofku ku qanco darajada labaad waligiis magaaraayo darajada kowaad.

Fiiro gaar ah:

Ficilka iyo aaminaada, aaminaadaa horeysa, inaad ficilkaan ku dhaqaaqdo oo samayso waxaa ka horeysa inaad marka hore aaminto inuu muhiim yahay.

Xikmad ayaa jirta oranaysa, suurtagal maahan inuu qofku ficil si joogta ah u sameeyo, haddii ficilkaasi aanu waafaqsanayn aragtida uu naftiisa ka aaminsan yahay.

Taasna macnaheedu waxa weeye, haddaad isku aragto inaadan mudnayn inaad noqoto qof leh yool cad, qorshe degsan iyo aragti dheer, waa adag tahay inaad warqad iyo qalin soo qaadato oo bilawdo inaad qorto hiigsiyadaada iyo qorsheyaashii aad ku gaari lahayd.

Tusaale arrinkan kuumuujinaya.

Waxa jirey laba nin oo dhallin yaro ah, waxey deganayeen oteel ka mid ah hoteelada raqiiska ah oo ku yaal magaalada NewYork ee dalka Maraykanka, labadaas dhallin yaro mid wuxuu ahaa qoraa caanka ah ee la yiraahdo (Dale Carnegie).

Dale Carnegie oo ka sheekaynaaya saaxiibkiis ayaa yiri, saaxiibkay wuxu noloshiisa ka bilaabay beer falid, laakiin waxaa jirtay hal shay oo uu kaga duwanaa dhallin yarada kala shaqaysa beerta taa soo ahayd 'inuu maalin uun noqdo madaxa ugu sareeya shirkad ka mid ah shirkadaha waaweyn ee maraykanka'.

Shaqadii ugu horeysay oo uu helo waxey noqotay inuu maqal haye (xisaabiye) ka noqdo qayb ka mid ah shirkada iibisa cuntooyinka. Maadaama wiilkan ay ka go'antahay inuu gaaro hiigsigiisa, wuxuu ahaa mid dalbada inuu ka shaqeeyo faracyada kale ee shirkadda waliba qeybaha waaweyn ee iibiya jumlooyinka si iskaa wax u qabso ah oo aanu lacag qaadanayn,

wuxuuna arrintaas uga golahaa inuu helo waayo aragnimo badan oo u sahlaysa inuu gaaro hiigsigiisa.

Maalin maalamaha ka mid ah ayaa waxaa banaanaatay shaqaduu hayay mid ka saraysa markaas ayaa dhammaan shaqaalihii iyo madaxdii shirkadaba u soo calmadeen inuu wiilkan qabto shaqadaas, iyagoo sabab uga dhigaaya inuu yahay wiilkan mid karti badan, han sare leh ahna mid ka soo bixi kara shaqadiisa.

Wiilkii isagoo hormarkiisii ugu socdo si habsami leh ayaa wuxuu shaqo ka helay shirkad ay ku adkaatay iney talaabo horey u qaado, waayo jagooyinka sare ee shirkadaan ayaa waxey u xirneyd dadka shirkada leh iyo qaraabadooda.

iyadoo ay dhibtaas oo dhan ku dhacdey haddana marna maskaxdiisa ka ma bixin hiigsigiisii uu har iyo habeenba ku taahaayay ilaa uu ugu damayntii noqdey madaxa ugu sareeya shirkad ka mid ah shirkadaha waaweyn oo uu waliba ka sii gudbay oo uu isagu asaasay shirkad ka mid ah sharikaatka waaweyn.

Akhriste sidaad aragtaba wiilkan markuu lahaa waxaan noqon doonaa gudoomiyaha shirkadaha waaweyn mid ka mid ah, ma’ ahayn mid riyoonaaya mala awaal ku nool ee wuxuu ahaa mid ka hadlaayay aaminaad dhuuxa ka gashay, naftiisa ayuu qorshe u sameeyay kadibna wuxuu u tafaxeytay siduu yoolkiisa ku gaari lahaa, waadna argtaa wuu gaaray.

Sababta 2aad

1.Dadka qaarkood wey jecel yihiin inay noqdaan kuwa leh qorshe degan hiigsi cad, laakiin waxaa ka maqan oo aanay aqoon habkii ay u dajin lahaayeen.

Akhriste, dadka noocan oo kale ah waa dadka aan u qoray buugan inay ka bartaan kana dheegsadaan habka loo dajiyo qorshe hiigsina loo jaan gooyo.

Dadka nocaas oo kale ah, waxaa ka mid ah qof jecel hormarka laakiin aan talaabo horey u qaadeyn, soo layaab maahan inaad wax hiigsanayso hadana aadan u diyaar garoobayn!

Sababta 3aad.

Dadka qaarkood waqti lumis ayay u arkaan qorshe dajintaan, hiigsi qoridaan, ahmiyad weyn inay ku fadhidana uma arkaan.

Wuxuu leeyahay Dr Ibrahiim Fiqi:

Waxaan la kulmay nin u arka qorshe dajintu inay tahay arrin aan muhiimad weyn ku fadhiyin, waqti lumisna ah wuxuuna u sheegey ninkaasi inuu ka qeyb galay tababaro ama muxaadaraad badan oo lagaga waramaayo qofku inuu hiigsi yeesho qorshena degsado laakiin inaanu waxba ka faa'iidin.

Ibraahiim fiqi ayaa ninkii weydiiyay oo ku yiri, ma dhici kartaa inaad maanta gaarigaaga qaadato oo aad u safarto meel kugu cusub oo aadan waxba ka garanayn adigoo aan kaxeysanayn qof yaqaan ama aadan qaadan khariidad ku hagta oo aad ku kala garato meshaad marayso iyo inta kuu hartay?

Markaas ayuu yiri Maya …. Maya …. Maya, taasi waa isbiimayn cad.

Su'aal kale ayuu weydiiyay oo wuxuu ku yiri: maxaad samaysaa markaad aadeyso safar noocaas oo kale ah?

Wuxuu yiri: - waxaan xaddidayaa meeshaan u socdo, dantaan ka leeyahay, inta maalmood uu qaadanaayo safarkaan, qof yaqaan ayaan ka xaysan ama hage ayaan qaadanayaa aan kala socdo meeshaan u socdo.

Si kale ayuu su'aashii ugu dhigey oo wuxuu weydiiyay, maxaa dhici kara haddii aadan intaas samayn?

Markaas ayuu la soo boodey ninkii jawaab la yaable "waa hubaal in aan rafaadaayo, dantaydiina aanan wada gaarayn, waddadana ka lumaayo". sheekadaan waxaan ka soo xigtay buugga (xakamee noloshaada) Dr ibraahiim fiqi.

Akhriste sidaad sheekadaan ka dhadhansanayso waa qof aan ogolayn inuu safar qaadanaaya laba maalmood ku tago meel aanu garanayn isagoo aan qorshe u dajin, laakiin dhanka kale aan qiima u arag inuu noloshiisa ideylkeed uu qorshe u dajiyo, kuna ta lagalay inuu noloshiisa ku noolaado qorshe la'aan iyo jaah wareer daba dheeraada.

Dadku waa wada safar.

Walaalkayga qiimaha badanoow waad socotaaye halkee usocotaa? Safar ayaad tahaye halkee reerka ku furin? Miyaadan xasuusan xadiiskii Nabiga (NNKH) uu inoo ku sheegey in qof walba subaxdii ka lahaayo kadibna ay dadku noqonayaan mid naftiisa xoreeyay iyo mid naftiisa haligey. Laakiin waxaa is weydiin leh muxuu ku xoreeyay muxuuse ku halaagey? Wuxuu ku xoreeyay qorshe degsan, hadaf cad, aragti dheer, wuxu ku haligey qorshe la'aan, hiigsi la'aan, maan gaab dhimo iyo nolol ku salaysan is barbar yaac aan xad lahayn.

Ma ogtahay akhriste in dadku laba yihiin, mid yeeshay hiigsi cad oo goortaas har iyo habeen ku taahaaya siduu ku xaqiijin lahaa iyo mid ilaawey wixii adduunkan loo keenayna ay maskaxdiisa ka baxdey inuu hal maalin oo is weydiiyo, muxuu ilaahay kuu abuuray? Maxaad adduunkan ka goysaa? Maxaad qiima ah oo aad Alle aktiisa ka leedahay?

Sababta 4aad.

Dadka qaarkood cabsi ayaa u diideysa inay qorshe degsadaan, cabsi uu ka cabsanaayo inuu ku fashilmo qorshahaan uu dajiyay iyo walwal kahaya mustaqbalka.

Laakiin waxaa is weydiin leh maxaa keenay inuu qofku ka cabsado inuu ku fashilmo qorshihiisa mustaqbalka? Maxaa keenay inuu heerkaas ka gaaro walwalka ka haya mustaqbalka?

Arrimo badan ayaa keena waxaana ka mid ah: tijaabooyin soo maray qofkaan oo ku reebay cabsida intaas le'eg, kalsoonidiisii burburisay had iyo jeerna u soo direysa fariimo xanbaarsan niyad jab, mustaqbal mugdi ah, xumaan saadsi, iwm.

Nolosha dadka waxaad ku arkaysaa gabar ku oranaysa anigu mar danbe ma guursanaayo, haddii aad ku dhahdo maxaa sababay inaad go'aankaas qaadato waxey ku oranaysaa "kii hore ee i guursadey ayaa iga niyad jabiyay marka nimanka oo dhanba sas ayaan ka qabaa, cuqdad ayaan guurka ka qaadey". waxaad arkaysaa qof ku dhahaaya aniga ganacsi danbe laygu arki maayo, haddii aad sababta weydiisayna wuxuu kaaga sheekaynayaa jab badan oo ka soo maray arrintaas. Waxaad arkaysaa ardey neceb maado, haddii la weydiiyana wuxuu kaaga sheekaynayaa maalin uu ku dhacay maadadaas, macallin ku xumeeyay maadadaas iwm.

Haddaba guuldarada qofka ka raacda hawl uu sameeyay waxey ku abuurtaa cabsi uu ka cabsanaayo mustaqbalkiisa danbe iyo inuu markale tijaabiyo inuu goolka la helo shabaagta iyo inuu mar kale tijaabiyo nasiibkiisa.

Laakiin waxaa is weydiin leh, side ayuu qofku uga gudbi karaa oo naftiisa uga tirtiri karaa jabkaas kharaarka badan ee raadka ku reebay?

Dr Ibraahiim fiqi ayaa wuxuuna siinayaa talo aad u muhiim ah oo uu ku qoray kitaabkiisa la yiraahdo (xakamee noloshaada) wuxuuna yiri: -

Qofka cabsanaaya waa maxbuus ku xiran mala awaalkiisa, shakiyadiisa, kalsooni daradiisa, talaabada ugu horeysa ee uu kaga bixi karana waa inuu la dagaalamo cabsidaan haraysay naftiisa, inuu go'aan ku gaaro siduu uga takhalusi lahaa dhammaan raadadkii ay ku reebeen guul darooyinkii soo maray, kuna ta lagalo inuu saxo khaladyadii keenay inay guul darooyinkaasi ku dhacaan.

Sababta 5aad.

Dadka qaarkood waxey jecel yihiin inay xiligey doonaan soo kacaan, markay rabaan seexdaan, goortay doonaan saaxiibadood la caweeyaan, wuxuuna u arkaa qorshe dajintaan inay ciriiri ku keenayso noloshiisan xuriyada ah, saas awgeed iskuba taxalujinmaayo qorshe dajin.

Sababta 6aad.

Deegaanka uu ku nool yahay ayaan u saamaxeyn inuu noqdo qof qorshe leh, hiigsi leh, inuu noqdo qof waqtigiisu u gooraysan yahay, una nidaamsan yahay.

Haddii aan waligiis lagu dhihin qorshe degso, aanu arag waalid iyo walaal qorshe u degan yahay, aanu helin saaxiib fiican oo qorshaha nolosha la dajiya, uu ku koray degaan ay astaanteedu tahay jaantaa rogan (furan), xiligaa rabtana soo kac xiligaa rabtana seexo, sidee ayuu qofku u noqonayaa mid qorshe degsada ama noqdo mid ay u nidaamsan yihiin hawlihiisu?

Sababta 7aad.

Waxaan u kala cadeyn sidii uu hawlaha u yaal ukala hormarrin lahaa, waxaa ku adag inuu kala shaan dheeyo hawlaha u yaal oo midba booska ay leedahay u dhigilahaa.

Aqoon yahanka caanka ah ee la yiraahdo Gray, ninkaasoo waqti aad u dheer ku bixiyay raadinta tilmaamaha ka dhexeeya dadka guulaystayasha ah, ayaa waxaa u soo baxdey inaanay ahayn astaanta ka dhaxaysa guulaystayaasha shaqada badan, nasiibka, dadaalka badan, kartida, bal ay tahay astaanka ka wada dhaxeysa “canjeelo sidey ukala sarayso ayaa loo kala guraa” (Ood dhacmeed say u kala saraysaa loo kala qaadaa) …… ama Oodi sidey ukala saraysaa loo kala guraa”.

Waxa jira qaanuun oranaaya “saacadda iyo bawsalada” ama (Gooreysada iyo jiheeyaha) saacada waxaa loola jeedaa waqtiyada aad haysato, ballamaha aad leedahay, waajibaadka ku saaran, jadwalada aad haysato, isku soo ururiyoo waxaa loola jeedaa “muxuu waqtigaagu kaaga baxaa? Qaabkee waqtigaagu u qaabaysan yahay ama u nidaamsan yahay?”.

Jiheeyaha waxaa loola jeedaa “waxeynu xanbaarsanahay ee ah fikrado, mabaadi, qiyam, aragtiyo,”.

Sababta 8aad.

Dulqaad la'aan, ku dhabar adeyg la'aan, joogtayn la'aan ayaa haysata, markuu wax bilaabo muda kadib wuu joojinayaa halkiisii ayuuna ka miisanayaa noloshiisii jaantaa rogan (fawdada).

Haddii aadan noloshaada qorshaysan sidee noqonaysaa?

Waxaa lagu tilmaami karaa nolosha aan lahayn qorhse degan iyo hiigsi cad mid ku astaysan arrimahan soo socda.

1.Yool la'aan waxey noqon noloshu sidii doon aan lahayn naakhuude haga …. Ugu dambayntana afka ku dhufsata buuraha waaweyn ee badda hoos teeda ku yaal, halkaasna ay ku burburto.

2.Haddii qofku ku guul daraysto inuu noloshiisa qorsheeyo, waxey ka dhigan tahay inuu qorsheynaayo habkuu ku fashilmilahaa.

3.Waxaa la ogaadey in adduunku albaabada u furaayo qofka yaqaan halkee u socotaa, kaan qorshaha lahayna guuldaradiisu badan tahay.

4.Qorsheyntu maahan shay laga maarmi karo ee waxaa weeye udub dhexaadka nolosha isu dheeli tiran, la'aantiisana waxey noqotaa mid isku dhex yaacsan.

Tilmaamaha dadka guulaystayaasha ah (naajixiin).

1.Waa dad leh hal abuur.

2.Waa dad awood u leh inay galaan tartan.

3.Waa dad ku astaysan hawl karnimo.

4.Waa dad naftooda ku kalsoon.

5.Waa dad dulqaad badan.

6.Waa dad xikmad u saaxiiba.

Ma leedahay barnaamij maalinle ah oo kuu degsan?

Akhriste, ii ogolaw in aan ku weydiiyo su'aashaan oronaysa, ma leedahay barnaamij maalinle ah oo kuu degsan? Ma haysataa qorshe nidaamsan oo ku salaysan nolol maalmeedkaaga?

Dadka guulaystayasha ah waxaa lagu yaqaanaa inay leeyihiin shay u gaar ah oo ay dadka kale kaga soocan yihiin, waxey leeyihiin saacado ay sameeyaa waxyaalo u gaar ah oo dadka kale samayn.

Bal tusaalayaashan ila dhuux saad iila fahanto muhiimada ay leedahay inuu qofku yeesho wax u gaar ah oo dadka kale kaga duwan yahay.

Nabigeena (NNKH), ayaa markuu salaadii subax tukadey wuxuu u yeeray saxaabigii weynaa ee Bilaal wuxuuna ku yiri, Bilaaloow xalay sarqantaada ayaan jannada ka maqlaayay adigoo i hor socda ! ee maxaad samaysaa oo ku mutaysatay arrintaas ? akhriste ila fahan Nabigu wuu og yahay inuu Bilaal shanta salaadood masaajidka ku tukado, bal uu isagu adamo, tiirarka islaamka inuu sameeyo, camaladaas waa weyn ee saxaabadu sameeyaan inuu sameeyo, ee wuxuu raadinayaa camal u gaar ah oo uu Bilaal ku gaaray inuu jannada galo ! wax isaga kaliya uu sameeyo, jawaabtii Bilaal waxey noqotay inuu dhaho ‘ Rasuulkii ilaahayoow, mar kasta oo aan weysaysto salaad ayaan tukadaa ! bal u fiirso Bilaal ma dhihin waxaan jannada ku galay adanka, salaadaha waajibka ah, qur’aan akhriska iwm, ee wuxuu sheegey camal isaga u gaar ah, waayo kuwaas kale dad badan oo la sameeya ayaa jira.

Tusaale kale haddaan soo qaadano

Iridaas waxaa ka soo gelidoona nin ahlu janna ah!

Oraahdaas iyo bishaaradaas Nabigu (NNKH) wuxuu yiri sadex xili oo kala duwan, wuxuuna ku yiri hal nin, taasna waxey dhacdey mar uu Nabigu fadhiyay masjidka asxaab badana ay la fadhiyeen, ayuu wuxuu ku yiri asxaabtii la fadhidey albaabkaas waxaa ka soo geli doona nin ahlu janna ah, waxey sugaanba asxaabtii ninka soo gelidoona, waxey is weydiiyaanba yuu noqon doonaa ninkaasi, ayaa waxaa albaabkii ka soo galay nin dadka iska caadiga ah ka mid ahaa, nin dadka aanay u haysan inuu wax kaga duwan yahay uu ku mudan karo in jannada loogu bishaareeyo isagoo adduunka jooga, Saxaabiga la yiraahdo Cabdullaahi bin Camri bin Caas oo ka mid ahaa raggii fadhiyay goobta ayaa ku tala galay inuu ogaado ninkaan wuxuu ku mutaystay bishaaradaan, kadibna xeelad ayuu degey uu uga golleeyahay inuu ogaado ninkaan xaaladiisa, ninkii ayuu u tagey wuxuuna ku yiri, aabahay ayaan isa soo khilaafnay, marka may ogolaanaysaa in aan sadex habeen kula seexdo ! wuxu ku yiri haa walaal soo dhowow gurigu waa gurigaagiiye, Cabdullaahi sadex habeen ayuu ninkii u fiirsanaayay, laakiinse waxaa la yaab ku noqotay oo waliba lama filaan ku noqotay inuu ninkii ka waayo cibaado dheeraad ah oo uu kaga duwan yahay, bal wuxuu arkay inaanay cibaadadiisu badnayn oo isaga cabdullaahi ah ka cibaado badan yahay ! isagoo yaaban ayuu ninkii weydiiyay oo ku yiri, walaal waxaa igu kalifay in aan sadexdaan habeen kula seexdo ma ahayn in aan aabahay isku dhacnay ee waxey ahayd, waxaan maqlay Nabiga oo sadex xilli oo kala duwan kuugu bishaaraynaaya jannada, haddana kuguma aanan arag cibaado dheeraad ah oo ka baxsan intaan sameeyo ee bal ii waran maxaad is leedahay jannada waad ku mutaysatay ? .

Ninkii wuxuu Cabbdulaahi ugu jawaabay inta aad aragtay ayaan cibaado sameeyaa …. laakiin waxaa jirta arrin ii gaar ah, arrintaasina waxaa weeye “habeenkii waxaan seexdaa anigoo qof kasta cafiyay, qalbadeydu nadiif tahay, qofna aanan uurka wax ugu hayn”, markaas ayaa Cabdulaahi ku yiri, waa taas midaad kaga duwanaatay qayrkaa oo aad ku mutaysatay jannada!

Akhriste sida aad uga jeedo sheekadaan, waxaad arkaysaa in wax yaalaha ay dadku isku dhaafaan aanay ahayn shayga dadka dhan ka dhexeeya ee ay wada sameeyaan, bal ay tahay wax yaalo gaar ah oo uu sameeyo qofkaas guulaystaha noqdey ama magaca yeeshay.

Waxaanna wada ognahay in ummada Nabi Muxammed uu ugu khayr badnaa (Abuu bakar alsadiiq), haddii aad taariikh nololeedkiisa baarto waxaad helaysaa inuu samayn jiro camalo iyo cibaadooyin u gaar ah.

Bal tusaalahan ila fiiri:

Nabiga (NNKH) ayaa markuu salaadii subax tujiyay saxaaba wuxuu weydiiyay su’aalahan

1.Yaa saaka sooman? Abu bakar ayaa yiri aniga.

2.Yaa saaka raacay janaazo qof dhintay? Abuu bakar ayaa yiri aniga.

3.Yaa saaka miskiin quudiyay? Abuu bakar ayaa yiri aniga.

4.Yaa saaka qof jiran soo booqdey? Abuu bakar ayaa yiri aniga.

Markaas ayaa Nabigu yiri: ma jiro qof intaas oo shay halmar wada kulansada illaa hadduu jiro jannada ayu gala.

Akhriste, markii aad yoolkaaga aad jaangoyso, qorshihii iyo habkii aad u fulin lahaydna aad qorshayso, talaabada ku xigtaa waxay noqonaysaa inaad talaabo horey u qaado adigoo uga golle inaad kala ogaato, yoolkaagii ma ka salgaartay mise wali kama aadan salgaarrin?

Sidee ku ogaanayaa in aan gaaray yoolkaan hiigsanaayay? Maxey yihiin astaamaha aan ku garanaayo in aan ka sal gaaray dantaan lahaa?

Haddaba si aad ku ogaato inaad ka salgaartay meeshaad hiigsanaysay, waxaad raacdaa ta laabooyinkaan sida

1.Is barbar dhig waxa kuu suurtagalay iyo wixii kuu qorshaysnaa, kee baa badan? Mase isku dhigmaan? Hawshaad ka salgaartay iyo waqtiga aad ku bixisay Ma isku qalmaan? Waqtigaad u qabatay hawshaasi inay ku dhamaato, maku dhamaysay mise wey kula dhaaftay?

2.Is qiimayntaasi waa inay tahay mid socota oo aan kala joogsi lahayn.

3.Waa inay qiimayntaasi noqotaa mid kulansanaysa dhammaan qeybaha hiigsiyadaada.

4.Is qiimayntaasi waa inay noqotaa mid kugu xanbaarta inaad xamaasad u sii yeelato dhamays tirka hawlaha kuu yaala, aanaysan noqon mid ku hanjabisa.

5.Waa inaad xasuusnaataa is le'egta guusha, taasoo ah sidan soo socota (hiigsi cad + qorshe cad + fulin dhab ah + is qiimayn joogta ah = guul iyo hormar).

6.Qorshe aan fulin lahayni waa nooc ka mid ah riyooyinka qarawga ah iyo waqti lumiska.

7.Fulin aanay la socon is qiimayni waa hal bacaad lagu lisay oo kale.

khriste, jaangooy hiigsiyadaada, fulintoodana Rabbina la kaasho, ku raaxeyso noloshaada, ogowna haddii buurtu aanay lahayn fiid sare cidna ma korteen, haddii aanay janno jirinna aakhiro camal suuban looma shaqaysteen, hadiii aanay raxmada Alle jirinna hididiilo ma jireen.

Akhriste, jaangoy hiigsiyadaada, beddel aragtiyadaada ku dhisan xagasha togan ama qaloocsan, jiir caqabada ku hortaagan ee kuu diidan hormarka, dheg haw dhigin hanjabiyaasha kula bartay hadalka qaloocsan, u soo jeed har iyo habeen sidii aad uga sal gaari lahayd hiigsiyada kuu degan. Akhriste, horey u soco kuna talakal inaad ka mid noqotay dadka magacyadooda taariikhda meel weyn ka galay.

CAQABADA 3AAD

ISKU DHEELI TIR LA’AANTA NOLOSHA.

Akhriste guusha dhabta ah waa midda isku dheeli tiran ee kulansanaysa dhammaan qeybaha noloshaada kala duwan.

Haddaba si ay kuugu suurtagasho inaad gaarto guul isku dheeli tiran, waxaa lagama maarmaan ah inaad dajiso qorshe miisaaman oo aan dhinacna u dheeliyin, dheeli gaasna waxaa ka ilaalinaaya inay u dhamaystiran yihiin tiirarkiisa ee kala ah:

1.Tiirka Cibaadada.

2.Tiirka Caafimaadka.

3.Tiirka Dhisida iyo hormarrinta naftaada.

4.Tiirka shaqadaada.

5.Tiirka lacagta, xaggee kaasoo gashaa, halkee ku bixisaa.

Haddii aynu mid mid u soo qaadano tiirarkaas waxeynu oran karnaa.

Tiirka 1aad.

Tiirka ciibaadada.

Tiirkan waa midka ugu muhiimsan dhammaan tiirarkaas aan kor ku soo xusnay, waa udub dhexaadka tiirarka ay ku taagan tahay nolosha miisaaman.

Akhriste, waa in aan ogaano in tiirkan la’aantiis noloshu noqonayso dhalanteed aan xaqiiqo ahayn.

Qofka ku guul daraysta xaqiijinta tiirkan isagoo inta kale noloshiisa ku guulaystay ha ogaado inuu ku nool yahay nolol nuxurkii laga qaadey qiima weyna aan Alle aktiisa kala hayn.

Akhriste, tiirkan oo aan ku guulaysano waxey ka dhigan tahay in aan nolosheena helno deganaansho iyo xasilooni dhan walba ah, wal wal iyo walbahaarna aan lahayn.

Tiirkan wuxuu ina siinayaa awood inoo suurta gelinaysa in aan horey ugu sii talaabsano nolosheena inta ka hartay.

Si haddaba aan u fahano tiirkan qiimaha uu ku fadhiyo bal aanu isla fiirino su'aalahaan daaha inoo ka qaadaaya qiimaha tiirkan uu nolosha miisaaman kaga jiro.

1.Anigu ma'ahay mid raali ka ah xiriirka aan la leeyahay Allena i abuuray?

2.Waajibaadka Alle isaaray ma'ahay mid si fiican uga soo baxa?

3.Ma ahay mid dadka tabaalaysan ee baahan gacan qabta oo u gargaara?

4.Ma leeyahay yoolal aan rabo in aan xaqiijiyo oo la xiriira xiriirka aan Rabbi la leeyahay?

5.Ma ahay mid had iyo jeer u tartama khayrka safka horena kaga jira?

Akhriste, qodobey talaabooyinkii aad ku hormarrin la hayd tiirkan inta aadan tiirka kale u gudbin

1.....

2.....

3.....

4.....

Tiirka 2aad

Ilaalinta caafimaadka.

Tiirkan wuxuu muhiim u yahay in la gaaro tiirarka intooda kale, waayo qof caafimaad qaba ayaa cibaadaysan kara, reer yagleeli kara, naftiisa horumarrin kara.

Sidaas awgeed waxaa inoo ka baahan yahay in aan ilaalino caafimaadkeena, in aan aad u daryeelno jirkeena, taasna waxey ku imaanaysaa in aan quudano cunto isku dheeli tiran.

Akhriste bal su'aalahan is weydii:

1.Caafimaadkaygu halkee marayaa? Ma hooseeyaa mise waa fiican yahay?

2.Goormaa iigu damaysey oo aan baaritaan guud isku sameeyay?

3.Miisaanka jirkayga munaasab miyaa mise siyaado ama nuqsaan ayaa ku jirta?

4.Ma jiraan caaddooyin xun xun oo caafimaadkayga dhaawacaaya? Mandooriyaasha ma'isticmaalaa sida sigaarka, qaadka, khamrada iwm?

Marka aad su'aalaha noocaas oo kale ah jawaab u hesho ayaad ogaanaysaa meelahaad ku liidato ee u baahan inaad iska tiiriso.

Ku dhaaf halkaan talaabooyinka aad ku hormarrin lahayd tiirkan.

1.....

2.....

3.....

4.....

5.....

Tiirkad 3aad

Hormarinta iyo dhisida naftaada.

Qofka raba inuu ka mid noqdo guulaystayaasha magacyadooda taariikhda meel weyn ka galay, waa inaanu ilaawin inuu hormariyo naftiisa sida dhanka waxbarashada, samaynta qoys suuban, tarbiyaynta caruur ku asteysan akhlaaq wanaag iyo himmad sare.

Tiirkan waxaa hoos imaanaaya wax kasta oo qofka shakhsiyadiisa la xiriira.

Akhriste bal su'aalahan is weydii si'uu kuugu caddaado tiirkan

1.Ma yahay xiriirka aan la leeyahay xaaskayga iyo caruurtayda mid heer sare ah?

2.Ma ahay mid akhrisku iyo wax barashadu ka mid noqdeen qeyb noloshiisa ka mid ah?

3.Ma ahay mid ka qayb gala muxaadaraadka iyo tababarada lagu barto sida qofku naftiisa u hormariyo?

4.Ma leeyahay gurigeygu maktabad iskugu jirta akhris, dhageysi iyo daawasho, oo aniga iyo qoyskayguba aan nafteena ku hormarrino?

5.Ma'ahay mid ka faa'iideysta waqtiyada ku luma makhaayad fariisiga, fadhi ku diraryada, socodka, sugid qof ila balamay iwm?

6.Ma ahay qof la jecel yahay? Xirrir noocee ah ayaa naga dhaxeeya aniga iyo bulshada aan ku dhex noolahay?

Talaabooyinka aan rabo in aan ku hormariyo tiirkan

1……..

2……

3……

Tiirka 4aad

Tiirka shaqada.

Shaqadu waxey ka mid tahay tiirarka ugu waaweyn ee ay ku taagan tahay nolosha dadka guulaystayaasha ah, qofku markuu shaqo helo waxaa u suurtagalaysa inuu reer samayso, naftiisa iyo caruurtiisaba waxbaro, caafimaadkiisa iyo midka eheladiisaba daryeelo.

Maadaama ay shaqadu sidaas muhiimka u tahay waxaa la gudboon qofka inuu had iyo jeer ka shaqaynaayo siduu u hormarrinlahaa shaqadiisa, inuu ku talagalo siduu ku helilahaa dalacsiin xagga shaqada ah.

1.Ma ahay mid ku faraxsana shaqaduu haysto?

2.Ma leeyahay qorshe ii degsan oo aan uga goleeyahay sidaan ku hormarrin lahaa shaqadeyda mustaqbalka?

3.Maxey yihiin talaabooyinka aan qaadi karo ee aan qayrkay kaga hormari karo?

4.Xiriir noocee ah ayaan laleeyahay akaasimaha, gudoomiyaha, mulkiilaha meeshaan ka shaaqeeyo? Asxaabta igala shaqaysa meeshaan ka shaqeeyo xiriirkaan laleeyahay mayahay mid ku dhisan tixgelin?

Talaabooyinkii aan ku hormarrin lahaa tiirkan.

1……..

2……

3……

4……

Tiirka 5aad

Tiirka maaraynta iyo maamulida dhaqaalaha isoo gelaaya, waxaana hoos imaanaya?

1.Dhaqaalahaygu ma yahay mid degan mise waa mid sabaynaaya?

2.Dakhliga isoo galaa mayahay mid dabooli kara baahiyaha ii yaala ee aan rabo in aan naftayda ku hormaryo?

3.Maxey yihiin mashaariicda aan maal gashan karo ee aan khibrada iyo waayo aragnimada u leeyahahay?

4.Ma waxaan ahay mid ku cayaara dhaqaalaha soo gala, mise mid si fiican u maareeya oo uga faa'iideya naftiisa, reerkisa iyo dhammaan inta iiga baahan in aan garab siiyo inta karaan kayga ah?

Talaabooyinka lagu hormarrin karo tiirkan.

1.....

2.....

3.....

Dhibaatooyinka ka dhasha markii ay tiirarkan isku dheeli tirmi waayaan.

Waxaa hubaal ah haddii tiirarka mid ka mid ah uu hoos u dhac ku yimaado inuu saamayn iyo raad aan wanaagsanayn ku reebaayo tiirarka intooda kale, taasna waxey keenaysaa in qofka noloshiisii aanay noqon mid wanaagsan oo lagu raaxaysto.

Noloshu waxey la mid tahay sidii dhisme ku taagan tiirar, haddii mid ka mid ah uu jabo ama dilaac ku yimaado, wuxuu saamayn ku yeelan dhismaha intiisa kale.

Si haddaba aynu u fahano arrintaan bal aynu wada akhrisano dhacdooyinkaan ka tarjumaaya mawduucan aynu ka hadlayno.

Dhacdada kowaad

Elvis Presley

Wuxuu ahaa heesaa caan ah, hantay qalbiyada kumanaan taageerayaashiisa ah oo ku kala nool adduunka dacaladiisa, gaaray darajo ay dad badan ku taahayaan inay nolosha adduunyo ka gaaraan, wuxuu gaaray darajo dad badan ay u arkaan inuu yahay ninkaan mid nasiibku la saaxiibay noloshuna iskugu duba dhacdey, wuxuu tusaale ay ku deydaan u noqdey kumanaan dad ah oo adduunka ku kala nool, ilaa ay gaareen inay sidiisa oo kale u labistaan oo dharka u xirtaan, timaha u jartaan " akhriste waad maqashay qaab tima jareedka loo yaqaan elfiska oo aad dhallin yaradu u jecel yihiin, ilbaxnimana u arkaan, hadde hab jarniinkaasi magaca ninkaas ayuu wattaa, waana siduu u jaran jiray timaha ".

Waxey heesihiisu gaareen inay noqdaan kuwa adduunka loogu iibsiga badan yahay xiliguu noolaa, waa lagu qiyaasaa cajiladihii ay ku duubnaayeen heesihiisu in laga iibiyay intuu noolaa ilaa 350 malyan oo cajil!

Ninkii saas ahaa waxey noloshiisii ku dhamaatay in maydkiisa laga helo suuli ama musqul dhexdeed isagoo jirkiisa laga helay 14 maado oo mandooriye ah, waxaana la aaminsan yahay inuu maandoori yaashaas u isticmaalay siduu naftiisa uga takhalusi lahaa adduunkanna isku dhaafin lahaa!

Haddaba su'aasha is weydiinta leh waxey tahay, maxaa sababay inuu heerkaas ku dameeyo Elvis? maxaa keenay inuu ugu damayntii is dilo isagoo da'diisu marayso 42 sano? Maxaa ka maqnaa oo uu baadi goobaayay? Maxaa keenay inuu noloshuu ku jirey ka door bido inuu is dilo?

Akhristaha ayaan u deyn inuu maankiisa la dabaasho jawaabtana uu la soo baxo.

Dhacdada labaad

Christina Onassis.

Qoyska ay ka dhalatay gabadhaan waxaa loo yaqaan dadkii Rabbi adduunyo iyo farxad gacanta u geliyay, laakiin ay ku noqotay lacnad iyo tiiraanyo.

Akhriste ii ogolaw in aan wax yar kaaga taabto nolosha qoyskaan iyadoo kooban.

Christina hooyadeed waa ay is dishay kadib markay soo martay nolol aad u kharaar oo ay ka buuxdo walwal iyo walbahaar, dharbaaxadii ugu damaysayna ay ahayd in ninkeedii maal qabeenka ahaa uu furay dumar kalena uu ka raacay.

Walaalkeedna waxaa la dhacdey diyaarad uu saarnaa oo halkaas ayuu ku naf waayay.

Aabaheedna markuu hooyadeed furay wuxuu guursadey naagtii uu ka dhintay madax weynihii hore ee maraykanka *Jacqueline Kennedy Onassis*, wuxuu ku kharash gareeyay malaayiin doolar isagoo baadi goobaaya magac iyo caanbaxnimo, iyadana guurkeedii khasaare mooyaane khayr kama dheefin.

Markaas ayaa noloshii aabaha waxaa isku biirsadey haweenaydiisii hore oo u furay, wiilkiisii oo diyaarad la dhacdey, guurkiisii danbe oo uu ku fashilmay! intaasi markay iskugu darsoontay ayuu murug la geeriyoodey.

Christina Onassis, oo ah gabadhaan ka sheekaynayno waxey aabaheedii maal qabeenka ahaa ka dhaxashay hanti aad u fara badan oo iskugu jirta diyaarado, maraakiib iyo doonyo, jaziirado, lacago caddaan ah oo lagu qiyaaso balaayiin doolar.

Waxaas oo hanti ah ayay dhaxashay laakiin nasiib darro nolol macaan kama aanay helin! raaxo kama aanay helin, barwaaqo iyo bash bash kama aanay helin.

Christina Onassis, waxey dhaxashay hanti maanta qof walbaaba uu ku taahaayo siduu ku heli lahaa isagoo baadi goobaaya nolol macaan oo raaxo leh.

Waxey dhaxashay hanti haddii loo qeybiyo 100 qof ay daqiiqado gudahood ku noqon lahaayeen hantiilayaal aan lacagtoodu is aqoon.

Akhriste waxaad moodaa inaad i weydiinaysid, xagee ku dhamaatay sheekadii Christina Onassis?

Waxey ku gaba gabowday inay ilaa afar jeer guursatay mid walbana uu ku dhamaadey furitaan iyo jab iyo leel (rafaad), wax la yaabka leh waxey ahayd markay guursatay nin shuuci ah oo matalaaya shuuciyadii (hanti wadaagii), iyana ay matalayso raasumaaliyadii (hanti goosadkii) reer galbeedka ! maadaama aragtida hanta wadaagu aanay ogolayn inuu qofku dego guri weyn shaqaalena aanu qabsan karrin Christina Onassis waxey ninkeeda shuuciga ah kula noolayd guri aad u yar iyadaana adeeganaysay oo guriga wax shaqaale ah uma joogin.

Markii ay saxaafadu iskugu timi gurigii ay deganayd oo ay weydiisay sidee hal guri iskugu imaan kartaa labada aragtiyadood ee hanti wadaaga iyo hanti goosadka? ….. *waxey ku jawaabtay waxaan baadi goobayaa ayaan fiican iyo nolol raaxa leh!* ninkii shuuciga ahaa wey iska furtay wuxuuna baadi goobkii kala dhacay dalka faransiiska waxeyna guursatey nin faransiis ah, waxaa la yiraahdaa 30 malyan oo doolar ayay siisay ninkaas si'uu u raaco uu ula dago dalka Swisserland, waxeyna biil uga dhigtay afar malyan oo lacagta englishka ah! laakiin nasiib darro markii ay hal gabar u dhashay ayuu iska furay.

Taariikhdu markay ahayd 1988 ayaa meydkeeda laga helay xeebta caasumada dalka Arjantiina iyadoo nafteeda ku khaarijisay isticmaalka daroogooyinka, markaasna da'deedu waxey maraysay 37 sano.

Haddii aynu si qoto dheer u fiirino sheekada gabadhaan, waxaan arkaynaa in aabaheed ahaa ninka adduunka xiligiisii ugu lacagta badnaa murug ayuuna u dhintay! Iyaduna waxey ahayd gabadha dhaxashay waxaas oo hanti ah waxeyna ku damaysay inay u dhimato isticmaalka maandooriyaasha! Waxaa si weydiin leh maxaa ka maqnaa gabadhaan oo ku kalifay inay isdisho? Inay aal kuliiste noqoto? Inay ka mid noqoto dadka nolosha ka dhacay iyadoo intaas oo hanti ah leh? Sow lacagtu maahan mid nolosha qurxisa la'aanteeduna ay tahay mid kharaar oo foolxun? Gabadhaan sow diyaaradey rabto ma raaci karto? sow dalkay rabto ma aadi karto? Sow cuntada ay rabto ma dalban karto? Sow guriga ay rabto ma dhisan karto? Maxey tabeysaa gabadhaan oo ka maqan waa yaabbe?

Mar la weydiiyay sow ma tihid haweenayda adduunka ugu lacagta badan? Waxey tiri haa waan ahay, laakiin waxaa ii sii dheer in aan ahay naagta ugu ayaanka daran! Waxaad moodaa inay jawaabteedu inoo soo koobtay su'aalaha aan iska weydiin karno nolosha gabadhaan.

Waxeynu sheekadeeda kala bixi karnaa inay gabdhaan ku guuldaraysatay inay isku miisaanto tiirarka nolosheeda, waxeynuna sheekadeeda ka ogaanay meesha uu ku dambaynaayo qof kasta oo aan noloshiisu isku dheeli tirnayn.

Akhriste bal si qoto dheer u dhuux aayadaan uu Rabbi ku leeyahay:

قال تعالى : مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَىٰ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً ۖ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ . سورة النحل 97 .

Rabbi wuxuu u ballan qaadey qofkii sameeya camal suuban, lab iyo dhadig midkuu rabo ha ahaadee inuu nolol wanaagsan ku noolaysiinaayo adduunka, akhirana camalkii uu sameeyay kiisa ugu wanaagsanaa uu ku abaal marrinaayo.

Waxaa is weydiin leh, maxey tahay noloshaan wanaagsan ee rabbi uu ballan qaadey ?. Wuxuu leeyahay Ibnu kasiir markuu aayadaan fasiraayo ' nolshaan wanaagsan waxey kulansanaysaa dhammaan noocyada raaxada dhankastaba ha ahaatee sida irsaaqad xalaal ah, liibaan iyo ayaan wanaag, cibaado suuban, zawjad saalix ah, qanaaca iwm '.

Waxaan filayaa inaynu aad u fahanay waxa ay tahay nolosha wanaagsan ee isku miisaaman.

Waxaan xasuustaa nin saaxiibkay qaali ah ayaan maalin la kulmay, markaas ayuu igu yiri intaas oo jaamacadood ayaan dhameeyay qeybtoodna waan waddaa, shaqooyin aad u fara badan ayaan qabtaa oo aad ayaan dhankaas uga ladnahay, markaas ayaan weydiiyay halkee dhimanaansho ka tabeysaa ? Wuxuu yiri dhanka cibaadada iyo qoyska, waayo waqti badan uma helo reer kayga anoo daalan ayaan imaadaa guriga sariirtaan ku dhacaa subaxdiina anigoo deg degsan ayaan baxaa! cibaadadana gaabis badan ayaan ka dareemayaa iyo nuxur la'aan.

CAQABADA 4AAD.

MAARAYN LA’AANTA WAQTIGA.

Akhriste, waqtiga oo la maamulo ama la maareeyo waa furaha hormarka, ummad kasta oo hormar gaartay waxey ku gaareen markay waqtigooda maareeyeen ama ay qorsheeyeen habkii ay uga faa’iidaysan lahaayeen.

Haddaba Anigoo ka anbaqaadaaya dareenka wanaagsan ee aan dalkayga hooyo u xanbaarsanahay iyo hormarkaan la jeclahay, ayaan is weydii yaa su'aalahaan, maxaa waddankayga dib uridey? Muxuu waddankaygu uga mid noqdey 10 waddan ee baasapoorkooda loogu neceb yahay? Muxuu waddankaygu in ka badan 20 sano dawlad la'aan u yahay? Muxuu waddankaygu u noqdey mid ay ka taliyaan hay’ado iyo ururo waddamo kale la galeeyahay?

Haddaba akhristaha qiimaha badanoow soo ma haboona in aan is weydiino, dad waddankoodii heerkaas maraayo hurda miyaa u taala? Ma inuu biibitooyinka iyo makhaayadaha ka sheekeeyo miyaa? Ma inuu waqtigiisa ku lumiyo fadhi ku dirdir iyo reer hebel ayaa ka fiican reer hebel miyaa? Macquul ma tahay iyadoo waddankeenii sidaas yahay in waqtigeena aan kulumino wax aan faa'iido inoo lahayn? Maynaan ogeyn dawladaha horumaray inay hormareen markay waqtigooda qorsheeyeen oo si fiican uga faa’iideysteen? Sidee waddankeena u hormarrinaynaa haddii waqtiga intiisa badan inakaga lumo marfish fariisi iyo qaad ruugid? Sidee dalkeena ku hormarrinaynaa haddii waqtigu yahay shayga ugu fudud ee inaka dayacma, dayacaadiisana aynaan u arag wax dhib ah?

Sheeko gogol dhig ah: -

Jamciyad u adeegta 40kun oo qof oo xanuunsan oo laga leeyahay dalka mareykanka ayaa cilmi baris ku samaysya inta waqti kaga baxda qofka xanuunsan cusbataalada ay jamciyadaan maamusho, cilmi baaristii kadib waxaa u soo baxdey in 10-20 daqiiqo kaga baxdo qofka xanuunsan, waxey kaloo cilmi baaristaas ku ogaatay in haddii ay dheeraato mudada uu sugaayo qofka xanuunsan ay sababtu tahay dhanka dhakhaatiirta, sidaas darteed ayay go'aansatay jamciyadaasi inay magdhaw ka bixiso waqtigaas ka lumaaya qofka xanuunsan inta uu sugaayo dhakhtarka qaabilsan xanuunkiisa, jamciyadii waxey magdhaw uga dhigtay in halkii daqiiqoba 5$ loogu magdhabo qofka xanuunsan , qofka xanuunsana uu xaq u leeyahay inuu kaargaas ku iibsado daawada iyo wixii kale oo adeega caafimaadka ah oo ay u geyso, hadduu rabana kaash ahaan ayaa loo siinayaa.

Waxey go'aansatay jamciyadu inay lacagtaas la siinaayo qofka xanuunsan laga jaro dhakhtarka sababay inuu qofkan xanuunsan 20 daqiiqo ka badan uu sugo.

Natiijadii ka soo baxdey go'aankaas ay qaadatay waxey noqotay in ay kor u kacdey adeeg wanaagii loo qabanaayay dadka xanuunsan.

Akhristaha qiimaha badanoow, haddii aad u kuurgasho sheekadaan waxaad ogaaneysa in dadka mas'uulka ka ah jamciyadaan ogaadeen qiimaha uu waqtigu ku fadhiyo, bal aynu in yar dhaqankeena fiirino oo is weydiino su'aalahana soo socda.

Majirtaa hay'ad, iskuul, wasaarad, xafiis noocuu doono oo adeega ha bixiyee ka daqmanaya waqtiga ka lumaaya dadka adeega loo qabanaayo? Bal xafiisyada iyo meelaha adeega bulshada loogu qabto intee waqti ayaa inakaga baxa oo inakaga luma sabatuna ay tahay dadka adeegaaya oo aan hagar baxeyn? Ma dhici kartaa in masuuliyiinta Soomaaliyeed sidaan u qiimeeyaan waqtiga? Goorma ayaan gaaraynaa in aan dareeno qiimaha uu ku fadhiyo waqtigu? Sow ma dhacdo inaad xafiis wax uga baahato, markaad xafiiskaas soo gashana qofka mas'uulka ka ah uu teleefan iskaga hadlaayo adna aad dultaagan tahay? Yaa waqtigaas lumaaya iska leh? Mas'uulkaan xafiiska fadhiyaa inta uu xafiiska fadhiyo ee ah saacadaha shaqada, xaq ma u leeyahay inuu saacadahaas dan gaar ah u adeegsado iyadoo uu dultaagan yahay qofkii loo adeegi lahaa? Sow ma dhacdo inaad xafiis wax uga baahato, sidaad u sugeysay markii waqtigii kaalumay lagugu yiraahdo ma joogo ama hadda ma qaabili kartid? Yaa u magdhabaaya qofkaas waqtigaas ka lumay? Haddii dhammaan xafiisyada adeega bulshada lagu sow rogi lahaa ganaax noocaan oo kale ah, soo kuma yimaadeen is bedel weyn dalkeena?

Cilmi baaris laga sameeyay dalka Masar oo lagu baaraayay habka ay shaqaalaha dawladu u gutaan shaqadooda ayaa waxey tilmaamaysa: -

27% Saacadaha shaqada waa ka soo daahaan shaqaaluhu.

21% shaqaaluhu waxey rawaxaan saacadii loogu ta lagalay rawaxaada ka hor.

29% waxey ulakac u joojiyaan shaqada sabab macquul ah la'aanteed.

27% si wahsi iyo caajis ku jiro ayay shaqadooda ku qabtaan.

20% saaxiibadooda kale ayay la sheekaystaan iyadoo lagu jiro xiliyadii shaqada.

26% caruurtooda ayay soo kaxeystaan goortaasna kaga mashquulaan adeegii bulshada.

30% waxey qaabilaan asxaabtooda oo soo booqatay xiliyada shaqada.

48% waxey ku mashquulaan arrimahooda shakhsiga ah.

Dabcan qofka akhriya cilmi baaristaan wuu ka naxayaa, laakiin haddii dalka Masar oo waligiis dagaal sokeeye gelin, dawlad la'aan aan noqon waligiis, sidaas shaqaalihiisii uu yahay inagu halkee joognaa? Bal aynu dib u fiirino adeega bulshada loo qabto, waxaan filayaa haddii aynu cilmi baaris ku samayn lahayn dalkeena inay soo bixi lahayd natiijo aad iyo aad looga naxo.

Qiimaha uu leeyahay waqtigu

Waqtigu waa shay dhakhso qofka dhaafa, waqtigii tagaa ma soo laabto, beddel iyo magdhaw ma aqbalo, waqtigii qofka dhaafaa sooma ceshan karo.

Walalayaal haddii aan waqtiga ku lumino wax aan faa'iido lahayn, waxey ka dhigan tahay inay nolosheenii luntay, waayo waqtigu waa nolosha, waqtigu waa raasumaalka ugu weyn aan haysano, haddii aan si fiican uga faa'iidaysano nolosheena iyo dalkeenaba wax weyn ayaa iska baddalaaya, wax soo saarkeena ayaa kor u kacaaya.

Waxaan ogsoonahay in waqtigu si deg deg ah inaku dhaafo waliba inagoo aan dareemayn.

Arrimo ay muhiim tahay inaan ogaano: -

1.Wax qabadka weyn waxaa la gaari karaa marka waqtiga si fiican looga faa'iideysto.

2.Waxyaalaha lagu qiyaaso hormarka ummadaha waxaa ka mid ah hadba sida ay waqtigooda uga faa'iideystaan.

3.Maddaama waqtiga wax lagu baddali karaa aanu jirin, daqiiqadii ku dhaaftaana aadan soo ceshan karrin, waxaa la oran karaa inuu yahay waqtigu shayga ugu qaalisan ee qofka bini aadanka uu haysto, waana weelka uu ku qabanaayo shaqo kasta oo uu istaago.

4.Waxyaalaha la isla ogolyahay oo aadan helayn qof diidan waxaa ka mid ah, in qof kastaa uu haysto 24 saac, midka faqiirka ah, kan hodonka ah, kan murugta ku nool, kan farxadda ku nool, dawladaha horumaray, kuwa dib u dhacay, dhammaantood waxey haystaan waqti is le'eg, laakiin waxaa is weydiin leh maxaa natiijada kala duwey? Maxaa qaarna u hormareen qaarna u dib dhaceen? Maxaa qaarna u guul daraysteen qaarna u guulaysteen? Dabcan jawaabtu waxey noqon " habka aan u bixino waqtiga ayaa kala duwan, sida uu waqtigu inoo dhaafo ayaa kala duwan, aragtida aan waqtiga ka haysano ayaa kala duwan ".

5.Waqtiga oo laga faa'iideystaa qiimihiisa ayay siyaadisaa.

Hal ku dhig ay dad badan caaddo ka dhigteen: -

Markaad dadka qaarkood ku tiraahdo waqtigaaga ka faa'iideyso, maxaad waxaas u qabsan weydey? Maxaad hormarkaas u hiigsan weydey? Wuxuu kuugu jawaabayaa " waqti mahaysto !! mashquulkaygaa badan! intaan hayo ka badan maqaban karo! ".

Qofka sidaas oranaya, waxaa haboon in lagu yiraahdo, 24 saac soo mahaysatid? 24 saac saacad kastaa soo maaha 60 daqiiqo? Lixdankaas daqiiqo ilmiriqsi kasta oo ka mid ah soo maahan 60 ilmiriqsi? Hadduu yiraahdo haa intaas oo dhan waan haystaa, waa in loo raaciyo in qof kasta oo dunidaan saaran uu intaas in le'eg haysto, qofkii sameeyay diyaaradda inuu intaas in le'eg haystay, midkii baabuurta sameeyay uu intaas in le'eg haystay, midkii dalkiisa hormariyay uu intaas in le'eg haystay. Haddaba haddii uu xaalku sidaas yahay maxaa natiijada kala duway " Natiijadu waa kala duwan tahay, waayo midna qiimaha waqtiga ayuu ogaadey midna ma ogaan! mid si fiican ayuu u maamulay oo uga faa'iideystay waqtigiisa midna wuu iska dayacay!".

Cilmi baari reer maraykan ah ayaa wuxuu cilmi baaristiisii ku soo saaray in qofka caadiga ah waqtigiisa uu ku luminaayo arrimaha caadiga ah ee nolohiisa ka mid ah ay tahay sidan.

Waqtiga uu ku bixiyo inta uu ka baha xiranaayo waa = 7 maalmood.

Inta uu istaago meelaha kontoroolada baabuurta = hal bil.

Inta wuu ku bixiyo timajaraha = hal bil.

Inta uu cadeyga kulumiyo = 3 bilood.

Inta gadiidka uu raacaayo uu sugayo = 5 bilood.

Inta uu musqusha iyo xaaja gudashada ku lumiyo = 6 bilood.

Inta uu akhrista kutubta ku lumiyo = 2 sano.

Inta uu cunta cunida ku lumiyo = 4 sano.

Inta uu shaqada ku lumiyo = 9 sano.

Inta uu hurdada ku lumiyo = 20 sano.

Walaalkayga qiimaha badanoow, maxey ka dhigan tahay cilmi baaristaan? Cilmi baaristaan waxey inoo caddeyn in meesha ay mushkiladu ka taagan tahay ay tahay habka uu waqtigu inoo dhaafo.

Sidaas awgeed, waddada koowaad ee aan hormarka u marayno waa inaan ka takhalusnaa fikradda oranaysaa " waqti mahaysto, waqtigaa igu yar, mashquul kaygaa badan, waqti igu filan ma helin".

Maxey muhiim u tahay in aan waqtigeena maarayno oo si fiican uga faa’iidaysano?

1.Waqtiga oo la maareeyo waxey ka dhigan tahay qofka oo naftiisa maareeyay, haddaba maaraynta waqtigu waa maaraynta qofku naftiisa maaraynaayo oo maamulaayo.

2.Maaraynta waqtigu waa maaraynta iyo qorshaynta shaqada qofka u taala ee laga sugaayo inuu sameeyo, kuna soo afjaro oo ku dhameeyo shaqadaas u taala waqtiga loogu tala galay, isagoo ku tala galaaya inuu ku sameeyo shaqadiisa dadaalka ugu yar iyo waqtiga ugu yar ee ay qaadan karto, goortaasna waqtiga soo haray looga faa'iideysto mustaqbalka sidii loogaari lahaa, hal abuur dhinac walba taabanaaya, dajinta qorshe dhaw iyo mid fogba, qofka oo naftiisa u hela xilliyo ay shaqada iyo hawlaha ka nafiso oo ka nasato.

3.Haddii waqtiga la maareeyo oo la qorsheeyo

Waxaa yaraanaynsa cabbashada dadka inta badan ka cabanayaan inayan waqti haysan shaqaduna ku badan tahay.

1.Qof kasta wuxuu jecel yahay in 24 saac oo dheeraada loogu daro waqtigiisa, taasna waa waxaan dhici karrin. Saas darteed waqtiga oo la maareeyo lana qorsheeyo waxey ka dhigan tahay 24 saac ee aad xaqa ulahayd inaad si fiican uga faa'iideysato.

2. Haddii waqtiga la maareeyo lana qorsheeyo

Waxaa meesha ka baxeysa cabashooyinka dadka inta badan dhahaan, waqti aan caruurtayda laqaato mahaysto, waqti aan ku raaxeysto mahaysto, waqti xattaa aan naftayda ku daweeyo oo cusbataal ku aado mahaysto.

1.Maraynta waqtiga waxey ka dhigan tahay inaad xaka mayso adigu oo hogaanka u hayso waqtigaaga ee aanu waqtigu adiga hogaanka kuu hayn oo ku maamulayn.

2.Qof walba oo adduunkan jooga wuu shaqeeyaa, waqtigu wuu ka baxaa, laakiin waxaa is weydiin leh, waa qofkee midka waqtigiisa si fiican uga faa'ideysta meel wanaagsanna ku bixiya?

3.Waxaan wada ognahay in waqti badan ay inaka qaadato waxyaalo aan faa'iido badan lahayn, hormarna aan kuu horseedeyn, taasna waxaa lagaga gudbi karaa maaraynta waqtiga.

4.Qof waqtigu u qorsheeysan yahay ma dhaho, waqtigaan rabaa in aan lumiyo, cabbaar ayaan Tvga daawanayaa waqtigaan xoogaa luminayaa.

5.Qof waqtigu u qorsheysan yahay ma yiraahdo, ma haysto waqti aan wax ku barto, akhris badan ku sameeyo, qur'aanka ku xifdiyo.

6.Qof waqtiga nidaamsadey oo qorshaystay, shaqadiisa kuma daalo, niyad jab ma dareemo, shaqadiisa kuma fashilmo.

7.Qofka waqtigiisa maareeyaa wuxuu hormariyaa naftiisa, dadkiisa iyo dalkiisaba.

8.Haddii bulshadu waqtigeeda nidaamiso oo maarayso, waxaa kor u kaca wax soo saarka dalka, horumar weyna waa gaaraan.

Akhriste, waqtiga oo la maareeyo waa ilbaxnimo, waa dadnimo, waa hormar, waqtigoo la nidaamiyaa wuxuu kuu suurtagelin inaad hesho waqti dheeraad ah oo Arrimo badan ku qabsan kartid.

Maxey waqtiyadeenu ulumaan oo aan uga faa’iidaysan weynaa?

Haddii uu qiima weyn inoo ku fadhiyo waqtigu maxeynu u deyacnaa? Muxu u yahay waqtigu shayga ugu rakhiisan ee aan lumino oo aynaan u ooyin lumitaankiisa? Run ahaantii haddii aan u dhabagalno waxa keenay arrintaas waxaan dhihi karnaa: -

Qofku wuxuu ku soo korey bay’ad sida waalidkiis, iskuulkii uu dhiganaayay, tvga uu daawado, asxaabtiisa, kutubta uu akhristo iwm, waxaana wada ogsoonahay in qof walba waalidkiis ka bartay habka loo maareeyo waqatiga, isla markaasna ilmuhu inuu ku garaadsado oo indhaha ku kala qaado habka ay waalidkiis ay waqtiga u maareeyaan oo u nidaamsadaan. Haddaba qoyska ilmahooda ku beera in waqtigiisa uu nidaamsado, uu ku ababiya in ilmahooda aanu dayicin waqtigiisa, waxaad arkaysaa inay yihiin ilma waqtigooda ka faa'iideysta, yaqaana qiimaha uu ku fadhiyo waqtigu, halka ilmaha kale ee ku caqliyeysta qoys aan waqtiga qiimihiisa aqoon, aan ilmahooda barrin siduu uga faa’iidaysan lahaa, aad arkayso inuu soo baxaayo qof aan nidaamsanayn, waqtiga qiima u ogeyn.

Isku soo duuduubo, bulshada uu qofku ku dhexnool yahay, haddii aanay qiima weyn u ogeyn waqtiga iyo nidaamintiisa, waxaa dhalanaaya oo barbaaraaya jiilal aan waqtiga qiima ulahayn, wax nidaam iyo qorshena lahayn, hadde dad xaalkoodu sidaas yahay sidee ayay dalkooda ku hormarrinayaan?

Haddii aan rabno in aan nafteena, dadkeena iyo dalkeenaba hormarrino, waa in aan ka gudubnaa oo ka talaabsanaa fikradaha khaldan ee aan waqtiga ka haysano, waa in aan nafteena iyo jiilalka soo koraayaba ku beerno inu waqtigu yahay waxa ugu qaalisan ee aan haanayo, dayacaadiisuna ay la mid tahay qofka oo dayacay naftiisa iyo dadkiisaba.

Maxaan ka faa'iideynaa nidaaminta iyo maaraynta waqtiga?

1.Waxaan dareemaynaa hormar la taaban karo dhammaan dhinacyada nolosha.

2.Qofku wuxuu helayaa waqtiyo dheeraad ah oo uu ku qabsan karo arrimaha isaga u khaaska ah, sida inuu waqti u helo caruurtiisa iyo xaaskiisa, inuu kobciyo aqoontiisa, inuu hagaajiyo xiriirka ka dhexeeya isaga iyo Allihii abuuray.

3.Wuxuu helaya waqti uu naftiisa ku hormariyo, kuna xaqiijiyo himilooyinkiisa.

4.Wax soo saarka dalka ayaa kor u kacaaya, taas oo keenaysa in dhaqaalaha dalku horumaro.

CAQABADA 5AAD.

AAMINAADA GURRACAN (TABAN).

Culimada ku takhasustay maskaxda aadanaha, waxay ku qiyaasaan in qofka maalintii inay soo marto **160** kun oo fikradood, 80% ka mid ah waa fikrado gurracan ama togan, oo qofka dantiisa iyo maslaxadiisa ka soo horjeeda.

Akhriste, bal tusaalayaashan soo socda si qoto dheer u dhuux, si ay kuugu cadaato caqabadaan dhibka badan ee bulshadeena ku habsatay asaageedna ka reebtay.

Sheekadii kabaha:

Waxaa jirey laba shirkadood oo ka ganacsada iibinta kabaha, waxay dirsadeen laba nin oo usoo xog ogaada in suuq kabood uu leeyahay waddan ka mid ah waddamada adduunka. Labadii nin markii ay tageen waddankii loo direy, waxay soo direen warbixin uu mid walba ku cabbiraayo wuxuu ku soo arkay waddankaas loo direy, warbixintoodiina waxay noqotay sidan:

1.Midkii 1aad wuxuu yiri: waxaan aad uga murugaysnahay waqtigii iyo kharashkii ku baxay safarkayga, waayo wuxuu ahaa safar guul darro. Waxaan tagay waddan aan laga aqoon kabo oo aysanba joogin cid kabo gashan, marka waxaan filayaa haddii aynu keeno kabo, in ay inaku baarayaan, wax inaka iibsadana aynu waayayno.

2.Kii labaad wuxuu soo direy warbixintaan: Bishaaro Bishaaro Bishaaro, waxaan maamulka shirkadayda ugu bishaaraynayaa in ay waddankaan taalo fursad weyn, waayo waxan soo arkay dad aan haysan kabo, waxaanna rajaynayaa in la kala boobidoona markabkaan keeno, haddaba si dhakhso ah ha loo soo dadajiyo soo raridda markab dhan oo kaba ah.

Akhriste, waxaa is waydiin leh, maadaama labada nin isku waddan loo direy, isku hawl loo direy, maxaa kala badalay warbixintooda? Muxuu ninba si ugu fasirtay kaba la'aantii ka jirtey waddankaas?

Sababtu waxa weeye, markii hore ayaa ninna u arkay inuu yahay safarkani fursad dahabi ah oo mar soo martay, ayna haboon tahay in laga faa'iidaysto, ninka kalena wuxuu u arkaayay in safarkaan uu yahay lugooyo iyo waqti lumis.

Akhriste, nolosha adduunkana waa laba baal, natiijaduna waxay noqonaysa hadba qofku baalkuu ka arko, hadba okiyaaluhuu gashado, hadduu okiyaale madaw gashado nolol mugdi ah ayuu arkayaa, hadduu okiyaale cagaar ah gashadana dhul wada doog ah ayuu arkayaa.

Lo’dii Holland iyo saxaaraha Sacuudiga:

Hadda kahor ayaa Sacuudigu wuxuu soo dhoofsaday lo’ada caanaha badan ee dalka Holland, lo’dii waxaa la keenay lama dagaanka dalka Sacuudiga (Saxaraha), cunta nooc walba ahna waa la soo hor dhigay, hase yeeshee lo’dii cunnadiina waa cuni wayday caanihiina waa dhiiqi wayday.

Muddo haddii la rogrogay arrintii lo’ada waxaa soo baxday in loo geliyo okiyaale cagaar ah oo arageeda ka dhigaaya cagaar, markii okiyaalihii loo geliyay ayaa dhulkii oo dhan wuxuu ugu muuqday cagaar, markaas ayay cuntadiina cuntay caanihiina dhiiqday.

Taasi waxay ka dhigan tahay in lo’daan waxaan cagaar ahayn aysan arag, una haysato in nolol cagaar ah mooyaane aysan meel kale ku noolaan Karrin.

Dad badan ayaa noocan oo kale ah, waxaa dhici karta inuu nolosha inta xun uga muuqato keliyah, bogga foosha xun u muuqdo keliyah, taasna waxay keenaysaa inuu nolosha ku raaxaysan waayo.

Talaagadii barafka iyo ninkii ku dhex dhintay.

Talaagadaha waaweyn ee wax lagu qaboojiyo ayaa niman ka shaqeynayeen, markii ay shaqadii dhammaatay ee shaqaaluhu rawaxaayeen, ayaa waxaa lagu ilaaway hal nin, talaagadii ayaa albaabada loo xirey isagoo qofku dhex jiro, ninkii talaagada lagu xirey ayaa wuxuu suuraystay, isagoo baraf noqday, meeluu cid kala hadlana aan haysan, labada beri ee soo socotana ay fasax tahay oo aysan shaqaale imaanayn. Intaas markuu isku dubaritay ayaa waxaa usoo baxday inaanu noolaanayn, wuxuu isku dayay inuu bal is kululeeyo oo uu talaagada dhexdeeda ku ordo, mudda markuu ordaayay uu daalay ayuu meel iska fariistay wuxuuna bilaabay inuu dardaarankiisa qoro inta aysan naftu ka bixin. Ninkii waxaa loo yimi laba beri kadib isagoo naftii ka baxday oo dhintay, waxaase la yaableh, talaagadu ma’aysan shidnayn ee waa dansanayd!

Haddaba, halkee ku jirey barafkan dilay ninkan maadaama aysan shidnayn talaagadu? Maxaa dilay ninkaan haddii ay caddaatay in talaagadu aysan baraf lahayn?

Su’aalahaan iyo kuwa la midka ah markaad is waydiiso, waxaa kuu soo baxaysa, in qofku wuxuu iska dhaadhiciyo ee uu maleeyo uu helaayo, ninkaan wuxu iska dhaadhiciyay inay talaagadu shidan tahay barafna ay tahay, iska dhaadhicintii uu maskaxda gashaday inuu baraf ku dhex jiro ayuu u dhintay ee baraf madilin.

Hooyadii gaariga halka gacan ku dalacday.

Sheekooyinka tusaalaha loo soo qaato waxaa ka mid ah, inay jirtay haweenay wadatay gaari, iyadoo safar ku jirta ayaa gaarigii ka banjaray, kadibna waxay bilawday inay banjariso gaariga oo shaaga banjaray ka badasho. Giriigii ayay la soo baxday si ay gaariga ugu dalacdo, markii ay gaarigii dalacday ayay aragtay ilma yar oo ay dhashay oo gaariga hoos galay, giriigiina uu ka fikanaayo gaariga, markay u muuqatay ilmaheedii oo gaarigu ku fariisanaayo ayay is hayn wayday oo gaarigii ku dalacday hal gacan, gacantii kalena ay ilmihii ku soo saartay!

Akhriste, wey dhici kartaa inaad istiraahdo, waa dhacdo xaqiiqda ka fog, laakiinse yaysan kaa hoos bixin in aaminaadu awoodda haaga iyo kartida kugu duugan ay soo saarayso.

Akhriste, la yaabkan wuu kaa baxayaa markii aad dhuuxdo sheekadii Maryam bintu cimraan markii ay umushay Nabi Ciise ee Rabbi ka codsaday inay ruxdo jirida geedka timirta ah ee ay ku hoos umushay si ay miro ugu soo daataan.

Akhriste, bal ila qiyaas, hooyo umul ah, geed timir ah jiriddii ma ruxi kartaa oo miro makasoo daadin kartaa? Waa suurtagal inaad igu dhahdo, taasi mucjiso ayay ahayd Rabbi siiyay Nabi ciise hooyadiis!

Laakiinse akhriste, ii ogolaw in aan ku weydiiyo su’aashaan, haddii ay mucjiso ahayd soo Rabbi ma awoodin inuu miraha usoo dajiyo iyadoo aan laga dalban inay ruxdo geedka, sidii uu awalba Alle ugu keeni jirey mira kala duwan iyado ku dhex jirta qolkay kaga cibaadaysanaysay (Baytul maqdis)? Mase dhici kartaa in aan xagal kale ka fiirino oo is waydiino in Alle ina baraayay arrimahan soo socda:

-Inuu qofku sababta la yimaado, Rabbina natiijada iyo miraha u daayo.

-In hadduu qofku isku qanciyo inuu shaygaas ka salgaari karo, inuu kasal gaari karo.

Run ahaantii, ma aanan arag culimo xagashaan ka fiirisay aayada macnaheeda iyo ula jeedkeeda, waase faa’iido iiga soo baxday aayada macnaheeda, haddii aan asiibay Alle xagiisa ayay ka ahaatay, hadii aan ku gafay macnaha aayadana waa xagayga iyo shaydaan.

Akhriste, qofku hadduu aamino inuu shaygaas samayn karo, wuxuu raadin habkii ay ugu suurtagali lahayd inuu ka salgaaro shaygaas uu aaminay inuu sameeyo, taasna waxaa tusinaysa tusaalayaashaan soo socda:

Legdankii Cali bin Abii Daalib iyo Camr bin Cabdi Wud.

Dagaalkii gashaan buurtu ku soo qaadeen magaalada Madiina ee la oran jirey dagaalkii (Axzaab), ayaa waxaa dhanka gaalada ka soo baxay nin la yiraahdo Camr bin cabdi wud, ninkaan wuxuu ahaa nin dagaal yahan ah, mudda dheer ku soo dhex jirey dagaalo, loona yaqaanay ninkii u dhigmay kunka nin. Dhanka muslimiintana waxaa ka soo baxay wiil dhallin yara ah, oo la yiraahdo Cali bin abii daalib, bal ila qiyaas wiil dhallin yaro ah oo aan waayo aragnimo dagaal lahayn iyo nin halgamaa soo dagaalami jirey ah fagaaraha iskugu soo baxay, maxaad u malayn inay natiijadu noqonayso? Haddii aynu hal aragti ka qaadano waxaynu dhihi karnaa odaygaan ruugcadaaga ah wiilkan dhallin yarada ah u daahi maayo, daqiiqado ayaa la arkayaa wiilkii oo dhiigiisa dhex dabaalanaaya iyo odaygii oo qoslaaya!

Laakiinse, saasi ma dhicin ee waxaa la arkay odaygii oo dhulka la dhigay dhiigiisiina dhex dabaalanaaya iyo wiilkii dhallin yarada ahaa oo qoslaaya.

Akhriste, maxey kula tahay inuu Cali kaga adkaaday ninkan? Ma waayo aragnimo dagaal ayuu kaga reeyay? Ma xoog badni ayuu kaga raayay? Ma seeftiisa ayaa ka afbadnayd seefta odayga? Waxaas oo dhan ma dhicine waxaa jirey hadal kooban oo dhex maray labada nin inta uusan dagaalku bilaaban, hadalkaas oo ahaa sidan:

Odaygii ayaa yiri markuu arkay Cali oo usoo banbaxay dagaalkiisana diyaar u ah “wiilkaygiiyoow in aan ku dilo ma rabo, mana jecli in aan seeftayda iskaga wasakheeyo dhiigaaga, waayo wali caanihii aad hooyadaa ka nuugtay ayaa afkaaga ka qoyan”, Cali ayaa hadalka qabsaday oo yiri “hadde anigaa raba in aan ku dilo”. Intaasi markay dhex martay ayaa Cali ku yiri isagoo xeelad dagaal cayaaraaya, intaas oo qof oo ku dabataagan ma anigay ila dagaalamayaan, ninkii ayaa gadaal fiiriyay isagoo hubsanaaya in ay cid kale soo raacday, markuu gadaal jaleecayba Cali seefta ayuu la gaaray oo ninkii surka kaga gooyay, halkaasuuna Cali ku dilay ninkii.

Sheekadan waxaa inooka soo baxaysa, markii uu Cali usoo banbaxaayay la dagaalanka ninkaan ayuu aaminay inuu ninkaan iska celin karo, aaminaadaas ayaa waxay u suurtagelisay inuu raadiyo habkii uu iskaga celin lahaa una maarayn lahaa dagaalka uu la gelaayo ninkaan.

Haddii aan Cali aamineen inuu ninkaan iska celin karo, waxaa hubaal ah iskuma taxalujiyeen inuu usoo banbaxo mana radiyeen hab uu iskaga celiyo.

Sheekadan waxaa ku cad in marka qofku aamino shayga uu raadiyo habkuu u gaari lahaa, laakiin hadduusan aaminin inuu gaaraayo inuusan ku fikrayn habkii uu u gaari lahaa.

Yaa hal malyan oo doolar ku heli kara hal sano isagoo raacaaya dariiq xalaal ah?

Su'aashaan waxay ahayd, su'aal aan weydiiyay ardey aan tababar ku saabsan kobcinta iyo hormarrinta aadanaha siinaayay. Markii aan su'aashan waydiiyay, wiil ayaa gacanta taagay oo yiri: waan heli karaa, waxay ku xiran tahay anigoo qur'aanka xifdiya kadiban Dubai aada, tartanka qur'aankana ka soo qeyb gala, lacagtaasna soo qaata!

Waxaa inoo muuqda in wiilkan markuu aamminay inuu heli karo, uu isku taxalujiyay siduu ku heli lahaa lacgataas kadibna waddadaas ayaa usoo baxday.

Akhriste, Badanaa inta iskarajiif caqligeena degan, nafteenana quutada, nolosheenana maamusha ,,,,, badanaa intaad maqlayso kelmada mustaxiiiiiiiiiiiiiil, ma'awoodi karo ,,,,,,,,, adakaa ……?

Laakiinse akhriste ha ilaawin in:

"Wixii qayrkaa usuurtagal ah adigana waa kuu suurtagal, wuxuu aadane sameeyay adna waad samayn kartaa".

Samayntii dayax gacmeedka maraykanka.

Dayax gacmeed hawada loo diro waxaa ugu horeeyay dalka Ruusha (Soofiyeetka), markii uu maqlay maraykanku in Ruushku dayax gacmeed hawada u dirsaday, ayaa madaxweynihii markaas maraykanka oo la oran jirey (John f. kennedy) la hadlay shacabkiisa oo uu yiri **"waxaan rabnaa in aan dayax gacmeed hawada u dirsano 10 sano gudahood",** muddadii uu qabsaday ayay ugu suurtagashay inuu dayax gacneed hawada u dirsado.

Taasna waxay tusaale u tahay, hogaamiyihii naftisa iyo shacabkiisa ka dhaadhiciya inay meel gari karaan, inay gaari karaan.

Akhriste, aaminaadda gurracan, waxay xakameen awooddahaaga, waxay xiraysaa dadnimadaada iyo hiigsiyadaada, waxay kaa dhigaysaa qof baralays ah oo aan dhamaystirnayn, waxay kaa xayuubinaysaa hididiilooyinkaaga, waxay kugu xireysaa dabarro aad u adag oo curyaan kaa dhigaaya.

Hadda kahor ayaa waxaa sheekaystay, suurtagal iyo suurtagal la'aan, waxay sheekadii wataanba suurtagalkii ayaa waydiiyay kii aan suurtagalka ahayn, xaggee dagan tahay? Wuxuu ugu jawaabay waxaan deganahay hididiilooyinka dadka caajislayaasha ah, dadka hanka yar, dadka aaminaada gurracan aaminsan, dadka nolosha inta xun ka arka.

Akhriste, kelmadahaan soo socda, qaamuuska dadka guulaystayaasha ah kuma jiraan, ma aha ereyo ay isticmaalaan guulaystayaashu ***(suurtagal maahan, adakaa, ma'awoodi karo, mustaxiil, iwm).***

Aminaada gurracan waxay baralays ka dhigtaa awoodda Caqliga.

Akhriste, aaminaada gurracani waxay xakameenaysaa awood caqliyeedkaaga, qofka ay ku habsato aaminaada gurracani wuxuu gaarayaa inuu arki waayo ama uu aamini waayo in Alle ku galadaystay nimca weyn oo la yiraahdo, nimcada caqliga ama maskaxda.

Akhriste, ii ogolaw in aan si kooban uga hadlo caqliga iyo habka uu u shaqeeyo iyo waliba heerka ay kala joogaan qofka caqligiisa ka faa'iidaysta iyo qofka aan ka faa'iidaysan.

Sheekadii Yuukii iyo dhagixii dheemanka ahaa.

Taariikhdu markay ahayd 1948 ayaa koox culimada ku takhasustay cilmiga jooloojiga waxay aadeen qaarada afrika iyagoo raadinaaya dhagxaanta qaaliga ah ee aan la heli karrin, culimadaas waxaa ka mid ahaa nin u dhashay dalka Japaan oo la yiraahdo magiciisa Yuukii, Yuukii wuxuu ahaa nin dhallin yara ah oo da'diisu marayso sodomeeyo, wuxuu ahaa nin firfircooni ka buxdo laguna bartay inuu yahay nin dulqaad badan oo aan noogin isla markaasna jecel is biimaynta.

Subaxdii horey ayuu hurdada ka kici jirey isagoo guda geli jirey shaqaduu afrika u soo aaday oo ah inuu baadi goobo dhagxaantaas qaaliga ah, kadibna galabtii ayuu ku soo laaban jirey hotelkii uu daganaa.

Dhawr maalmood isagoo halgankaas ku jira walina aan gacanta ku dhigin dhagxaan qaali ah, ayaa Yuukii wuxuu go'aansaday inuu dalkiisii iskaga noqdo maadaama uusan wali wax weyn helin, maalintii ugu damaysay ee uu u kallaho raadinta dhagxaantii qaaliga ahayd, ayuu soo laabtay galabnimadii isagoo soo hungoobay, laakiin markuu u soo socday hotelkii uu deganaa ayaa wuxuu wadada kula kulmay ilma yar oo da'diisu marayso ilaa lix sano, ilmahaas oo gacanta ku haystaa oo ku ciyaarayaa dhagax, Yuukii dhagixi ayuu wiilka ka qaatay wuxuuna kaga badashay xabbad nacnac ah. Yuukii markuu soo gaaray hotelkii uu daganaa ayu baaritaan ugu dhaqaaqay dhagixii uu ilmaha nacnaca kaga badashay.

Markuu baaray Yuukii dhagixii wuu rumaysan waayay natiijadii uga soo baxday, mar labaad ayuu ku celiyay baaritanakii, dhawr jeer ayuu ku celceliyay baaritanakaas isagoo aamini la' dhagaxaan uu maanta ilmaha nacnaca kaga badashay.

Baaritaan kaas dheer kadib dhagixii wuxuu noqday, kii ugu waynaa ee qaali ah oo uu Yuukii noloshiisa arko.

Wuxuu noqday dhagixii mid qiimihiisu ku fadhiyo kumanaan kun oo doolar.

Maalintaas ayuu qoray Yuukii maqaal uu kaga hadlay hantida uu wiilkaasi haystay laakiin qiima heeda uusan ogayn, maadaama qiimaheeda ogayna uu nacnac ku badashay, waxaana hubala ah hadduu ilmahaasi ogaan lahaa qiimaha dhagaxaas kuma iibiyeen ama kuma badasheen nacnac iyo xanjo.

Waxaana xaqiiqo ah haduu ogaan lahaa ilmahaasi qiimaha dhagaxaas inuu sabab u noqonlahaa isaga iyo qoyskiisuba ay faqriga iyo dhibaadada kaga bixi lahaayeen.

Faa’iido.

Wuxuu yiri DR Ibraahiim fiqi isagoo ka hadlaaya sheekadan: -

In badan oo dadka ka mid ah magaranayaan xaqiiqada awooddaha Alle ku galadaystay, garasha la'aantaasna waxay keentay inuu waqtigiisa, noloshiisa, naftiisa, uu ku lumiyo wax rakhiis ah..... sida wiilkaan aan garanayn xaqiiqada dhagaxaan uu ku cayaaraayay ee nacnaca ku badashay.

Intee qeybood ayuu caqliga bini aanku u qeybsamaa marka laga fiiriyo shaqadu uu qabto?

Waxaan wada ogsoonahay in Alle qofka bini aadanka ah hal caqli u abuuray, laakiin markaan fiirino shaqada uu qabanaayo ayaan u qeybin karnaa laba qeybdood oo kala ah (Caqliga soo jeeda iyo Caqliga hurda, ama Caqliga qarsoon iyo midka muuqda,) labadaas caqli magacyo badan ayaa culimadu ugu yeeraan iyagoo ka tixraacaaya shaqada ay qabtaan.

Sidee u shaqeeyaa caqliga bini aadanku?

قال تعالى :- وَفِي أَنْفُسِكُمْ أَفَلَا تُبْصِرُونَ .

Alle wuxuu inaka rabaa in aan dib u fiirino habka uu inoo abuuray, habka jirkeenu u samaysan yahay, sida xubnaha jirkeenu u shaqaynayaan oo mid walba shaqadiisa u qabanaayo, Alle wuxuu inaka rabaa inaan bal ku tadaburno oo u dhabagalno sida caqligeenu u shaqaynaayo.

Akhriste, ma ogtahay in madaxaaga uu ku jiro awoodda ugu weyn ee adduunka qof bini aadan ah haysto? Ma ogtahay awooddaas Alle kugu galadaystay haddii aad si wanaagsan uga faa'iidaysato inaad naftaada, ehelkaaga iyo dalkaagaba aad wax weyn ka badali kartid?

Akhristaha qiimaha badanoow bal ila akhri waxay culimadu ka yiraahdeen shaqada caqliga iyo wuxuu qabto.

1.Caqliga bini aadanku wuxuu ka kooban yahay 150,000,000,000 (boqol iyo konton bilyan) oo unug, DR la yiraahdo harbirt oo wax ka dhiga jaamacada Harvard ee waddanka maraykanka ayaa cilmi baaris uu qoray wuxuu ku sheegayaa hadal cajiib ah wuxuuna yiri " haddii aan tiro ugu dhaqaaqno unug yada caqliga inagoo ka bilaabayna 1 ilaa aan ka gaarayno 150,000,000,000 Bilion, waxaan u baahanahay 5000 sano, bal ila qiyaas akhristaha qiimaha badanoow.

2.Culimadu kontomeeyadii waxay dheheen bini aadanku caqligiisa wuxuu ka isticmaalaa 50%, lixdamaadkii markii lagaarayna waxay dheheen wuxuu ka isticmaalaa 20%, todobaataneeyadiina waxay dheheen wuxuu ka isticmaalaa 10%, sideed tamaadkiina waxay dheheen wuxuu ka isticmaalaa 5%, sagaashameeyadiina waxay dheheen wuxu ka isticmaalaa 1%, hadana waxay ku sheegeen kitaab uu qoray aqoon yahan u dhashay waddanka maraykanka cilmi baaristaas oo uu u bixiyay (the SIXE " F" s". Wuxuu ku sheegay inaynaan Caqligeena ka isticmaalin in ka badan 0.1%.

3.Wuxuu leeyahay DR Ibraahiim fiqi: - haddii aan soo qaadano ra'yiga oranaaya 10% ayaan ka isticmaalnaa awoodda caqligeena inta kalena inagoo aan ka faa'iidaysan ayaan qabriga la

galnaa, haddii aan 10% ku garanay wax aqoon, hormar, tiknaloojiga, maxaa u malayn lahaydeen hadii aan isticmaali lahaydeen 15 ama 20%? sidee xaaladu noqon lahayd haddii aan isticmaalilahayn 50%? Nolosha bini aadanku sidee noqon lahayd hormar noocee ah ayay gaari lahayd haddii bini aadanku isticmaali lahaa awoodda caqligiisa 100%? Akhristaha ayaan u dayn jawaabta si uu u rog rogo.

4.DR horbirt wuxuu cilmi baaristiisa ku sheegay in Caqliga qarsoon uu awood u leeyahay inuu aqbalo in ka badan 2,000,000 macluumad halkii ilmiriqsi, sidaas darteed fikirka qofka bini aadanka ah wuu ka dheereeyaa socodka ilayska oo ku socda 186 kun miles halki ilmiriqsi.

5.Haddii aan fiirino inta ay kaydin karto maskaxda qofka bini aadanka waxaa la yiraahdaa halkii unug waxaa ku sii dhex jira 1000,000 unug, haddii aynu marka isku dhufano 150 milyaar & halmalyan oo unug natiijada soo baxasyaa intee noqon? hade waa inta aqoonta bini aadanku gaartay, waxaana ka weyn inta aysan wali gaarrin.

Waxaa la yaableh in dad badan ku dhahayaan xifdigaygii waa daciifay ama hoos ayuu u dhacay isagoo haysta awoodda intaas le'eg!

Akhristaha qiimaha badanoow sow wax laga naxo maahan in dad badan aanay garanayn inay awoodda intaas le'eg haystaan? Soo jazaarnimo laguma tilmaami karo qofka awooddaha intaas le'eg haysta waxna ku xifdin karrin? Goorma ayuu ka faa'iidaysan awooddahaas Alle siiyay? Ma markuu dhinto ayuu ka faa'iidaysanaya? Sow wax laga naxo maahan awooddahaasoo aan laga faa'iidin inay qabriga galaan? Sow ila dareemi maysid awooddaha Alle inaku galadaystay inta ay le'eg yihiin?

Sidee u shaqeeya caqliga qarsoon?

1.Caqliga qarsoon waa xarunta ay fadhiyaan dareemayaasha ku dhisan caadifada, xubiga ama jacaylka, nacaybka, xanaaqa iwm.

2.Waa xarunta lagu keydiyo xasuusta qofka maalintuu dhashay ilaa inta uu ka dhimanaayo.

3.Caqligaan 24 saac ayuu shaqeeyaa, xiliga qofku hurdana isagu maseexdo.

4.Waa xarunta ay ku keydsan tahay caadaadka qofku leeyahay waxaana wax lagaga dhaadhiciyaa ku celcelin 6 ilaa 20 jeer, shaygaa laga dhaahicinaayo caqliga qarsoon makala garan karo inuu xunyahay iyo inuu fiican yahay, waa wixii aad ka dhaadhiciso.

5.Waa xarunta wuu qofku ku kaydsado xirfadaha, tusaale ahaan qofku markuu barto xirfad inuusan ilaawin xirfadaas waxaa keenaaya caqliga qarsoon ayaa u haya.

6.Caqliga qarsoon wuxuu amarada ka qaataa caqliga aan qarsoonayn, amarkii la siiyo ayuu fuliyaa, waxna ma amree wixii lagu borogaraamiyo ayuu fuliya isagoo aan ukala soocneyn sax iyo khalad. Tusaale ahaan haddii ad la fariisato qof qaba hargab, oo uu goortaas hindhiso, haddii aad aaminto inaad hargab ka qaaday hindhisadaas, aaminaadaasna aad dhawr jeer ku cel celiso, waxaa hubaal ah in aad is aragto adigoo hindhisaaya oo aamisan inuu hargabkii kugu dhacay.

7.Caqliga qarsoon wuxuu isticmaalaa dhammaan dareemayaasha shanta ah (maqalka, dhadhanka, araga, taabashada iyo urka) si uu u ogaado xaalada ka jirta hareerihiisa.

8.Caqliga qarsoon wuxuu xakameeyaa oo maamulaa xubnaha aan ku shaqayn doonitaanka qofka.

9.Caqliga qarsoon wuxuu saamayn ku leeyahay dareenka bini aadanka, tusaale ahaan waxaa laga yaabaa in qofku shay ku dhaqaaqo shay gaas markuu samaynaayana uu si kalsooni ah u samaynaayo, intuu shaygaas ku dhex jirey ayaa qof kale ku jeesjeesay hadal niyad jab ahna wuu ku yiri, waxaa suurtagal ah isla markaba inuusan caqligaagu qaadan jees jeeskaas laakiin muda kadib aad is weydiiso oo aad dhahdo " hadalkii hadaayay lagugu yiri armuu run ahaa oo waxaad samaynayso uu yahay shay liita mudana in qofkii samaynaaya lagu jeesjeeso" haddii aad mudo ku celcelisid hadalkaas caqligaaga qarsoon wuu cabayaa kadibna wuxuu ku qancayaa inuu yahay shaygaasi mid mudan in lagu jeesjeeso, halkaasna waxaa ka dhalanaysa inaad iska dhaafto, waayo caqligaagii ayaa aaminay inuu shaygaasi xun yahay.

10.Caqliga qarsoon wuu firfircoonaadaa mar kasta oo aynu ku kalsoonaano adeegsigiisana badino.

11.Caqliga qarsoon haddii farriimo wanaagsan loo diro wuu qaataa oo waa aqbalaa, tusaale ahaan haddii aad ku celceliso inaad tahay qof fiican, waxaad arkaysaa adigoo u dhaqmaaya sida dadka fiican.

Sidee u shaqeeyaa caqliga muuqda ama soo jeedaa?

1.Wuxuu weeleeyaa wax markaas dhacaaya.

2.U kuur galidiisu (Tarkiiskiisu) waa kooban yahay.

3.Isagaa borogaraamiya caqliga qarsoon.

4.Waa midka fikira, waana meesha fikirku ka soo baxo.

5.Marka uu caqliga qarsoon borogaraminaayo, wuxuu ku borogaraamin karaa fikrado sax ah iyo kuwa khaldanba.

6.Waa midka mas'uulka ka ah go'aamada uu qofku qaadanaayo.

7.Wuxuu maamulaa xubna ku shaqeeya qofka doonitaankiisa.

8.Isagaa gaarsiiya caqliga qarsoon waxa qofku rabo inuu ku dhaqaaqo (isagaa amar siiya caqliga qarsoon).

9.Waa qeybta caqliga awoodda u leh inay kala saarto fikiradaha xun iyo kuwa khaldan ama waxa fiican iyo waxa xun.

Faa’iido.

Caqliga muuqdaa waa sida naakhuudaha u doonta wada, caqliga qarsoona waa sida doontaas naakhuuduhu wado, sida naakhuuduhu doontaas u maamulaayo ayuu caqliga muuqdaa u maamulaa caqliga qarsoon.

Akhriste, inagoo intaas oo awoodda haysana, ma dhici kartaa in aan qeyrkeen tuugsano? Ma wax inoo qalmaa in dalkeenii dib u dhaco? Ma wax inaku haboon baa inaynu adduunka ka tagno, inagoo aan wax ku soo kordhin, waxaan xasuustay wiilkii dhallin yarada ahaa ee maalin maalmaha ka mid ah soo qaatay wargays, kadibna ku arkay bogga tacsida magiciisa oo sadexan, su’aashii ugu horeysay ee uu is waydiiyo waxay noqotay, ma sidaan ayaan adduunka uga tagayaa? Ma iyado ay isku mid tahay markaan dhashay iyo markaan dhimanaayo, ayaan adduunka ka tagayaa? Akhriste, ma is leedahay waxaa inaku dhaboobay, oraahdii Soomaaliyeed “Geelu awoodiisa wuxuu arkaa aakhiro.

CAQABADA 6AAD.

Duruufta iyo ku marmar siyeedkeeda.

Duruuf + fikrad ama go’aan = Natiijada dhalanaysa.

Anna jaamici ayaan ahay walaalkayna waa dareewal.

Sheeko gogol dhig ah.

Anigoo maalin jeedinaaya muxaadaro ku saabsan duruufta iyo sida dadku ugu marmarsiyoodaan iyagoo raba inay ku qariyaan guuldaradooda, ayaa waxaa ka mid ahaa dadkii dhagaysanaayay wiil dhallin yaro ah, wiilkii ayaa wuxuu iiga sheekeeyay dhacdo isaga ku dhacday, wuxuuna yiri:

Waxaan ahayn laba wiil oo walaala ah, wiilkii iga weynaa markuu dhameeyay dugsigii sare ayaa Aabbe ku yiri: lacag aan jaamacad kaaga bixiyo ma haysto, ee adigaa og saad samaynsid, markii saas lagu yiri ayuu go’aansaday walaalkay inuu dareewal noqdo, halkaasna wax barashadii kaga tago.

Aniguna markaan dhameeyay dugsigii sare, ayaa Aabbe igu yiri intii uu walaalkay ku yiri, markaas ayaan go’aansaday in aan geed dheer iyo mid gaaban u maro saan ku heli lahaa lacagtaan jaamacada ku dhigan lahaa, waana helay oo waykan aan maanta jaamacadda dhiganaayo.

Walaalkay waa dareewal anna jaamici ayaan ahay, walaalkay waxbarashadii waa ka tagay anna waa aniga ilaa hadda wada.

Akhriste, sida sheekadan ka muuqata duruufta qabsatay labadaan wiil, waa isku mid, mid walba Aabihiis ayaa ku yiri, lacag aan kaaga bixiyo jaamacad mahayo.

Su’aasha is waydiinta leh waxay tahay, maxaa nadiijada kala badalay? maadaama duruuftu isku mid ahayd maxay natiijadu isku mid u noqon wayday haddii xeerku dhigayo sidan:

Duruuf = natiijo?

Akhriste, qanuunka saxda ah waxaa weeye sidan:

Duruuf + fikrad ama go’aan = natiijada dhalanaysa.

Xeerkan wuxuu dhigayaa in duruuftu aysan samayn natiijada ee fikirka ama go'aanka qofku ka qaato duruufta, ay natiijada samayso.

Haddii duruuftu samayso natiijada, oo uu xeerku noqon lahaa sidan:

Duruuf = natiijo.

Natiijooyinka duruufta isku midka ah ka dhalataa ma kala duwanaateen ee isku mid ayay noqon lahaydeen.

Akhriste, soo ma'aadan arag dad cudur isku mid ah ku dhacay haddana noloshoodii isku meel ku dambayn, sow ma aadan arag dad hal duruuf qabsatay haddana aan noloshoodii isku mid ku dhammaan.

Arrimahaas oo dhan markaan u kuur galno waxaa inoo soo baxaysa in aan duruuftu samayn natiijooyinka, ee fikrada laga qaato ay samayso natiijada.

Walaalkaygna waa mooryaan anna dhakhtar ayaan ahay.

Akhriste, bal sheekadaan kale dhuux.

Waxaa jirey laba wiil oo walaala ah oo Aabahood ahaa nin aad iyo aad u dhaqan xun. Hooyadood ayuu hortooda ku dili jirey, khamrada iyo dhammaan akhlaaq xumada hortooda ayuu ku samayn jirey, ilaa maalintii danbe loo taxaabay dhanka xabsiga isagoo lagu soo eedeeyay inuu wax xaday, wuxuuna geeriyooday isagoo wali xabsigii ku jira.

Waxaase la yaableh, in labadii wiil midba natiijo ku dambeeyay, hadde ogow hal meel ayay ku koreen, hal Aabbe ayaa wada dhalay, hal duruuf ayaa wada qabsatay.

Labadii wiil midna waddadii aabihiis ayuu raacay oo ugu dambayntii xabsi gudihiis ayuu ku dhintay, midkii kalena wuxuu noqday dhakhtarka ugu cilmiga badan looguna jecel yahay magaalada uu ku noolaa.

Aqoon yahan ku takhasusay cilmu nafsiga ayaa arrintii layaabay, kadibna wuxuu bilaabay inuu raadiyo sababta keentay inay labadaan wiil kala duwanaadaan.

Wiilkii raacay waddadii aabihiis ayuu u tagay wuxuuna ku yiri: maxaa keenay inaad xabsigan gashid? Maxaa keenay inaad jidkii aabahaa oo kale marto?

Wiilkii wuxuu ku jawaabay, "haddii qof u noolaado saan u noolahay, go'aanka aan qaatay oo kalena uu qaato, waxaa hubaal ah inay u dambaynayso sida ii damaysay".

Wiilkii kale ayuu aaday ee noqday dhakhtarka caanka ah, markaas ayuu waydiiyay sababta keentay inuu heerkan gaaro? Wuxuu ugu jawaabay mid la mid ah jawaabtii wiilkii hore bixiyay.

“Haddii qof u noolado saan u noolahay, go’aanka aan qaatay oo kalena uu qaato, waxaa hubaal ah inay u dambaynayso sida ii damaysay”. sheekadaan waxaan ka soo xigtay kitaabka (*Haweenay ka bilan dhigeed) ee uu qoray Kariim shaadali.*

Akhriste, nuxurka aan sheekadaan kala baxayno ayaa waxay tahay sidan:

Faa’iidada 1aad.

Innaga ayaa samayna nolosha aan ku nool nahay ee duruuftu ma samayso.

Faa’iidada 2aad.

Xeer ayaa wuxuu oranayaa, maanta heerka aad joogto oo aad nolosha ka joogto, waxay ku timi go’aan aad qaadatay xili hore, beri heerkaad gaari doontana waxay ku xirnaan, go’aanka aad maanta qaadato.

Faa’iidada 3aad.

Astaanta lagu yaqaan guul darastayaasha ayaa waxay tahay, inay guuldaradooda dusha uga tuuraan duruufta soo food saartay.

Haddii aad weydiiso oo ku dhahdo maxaa wax u baran weyday wuxuu ku dhahayaa “duruuftaa ii diiday in aan wax barto”, haddii aad ku dhahdo maxaa asaagaa ula tartami weyday wuxuu ku dhahayaa “qabiil la yaso ayaan ka dhashay”!

Waxaan xasuustaa maahmaadii ahayd, wixii xunba xaawaa leh, marka haatan faashil kastaa duruufta ayuu cuskadaa isagoo raba inuu iska leexiyo inuu guul daradaan ku habsatay uu sabab u ahaa.

Faa’iidada 4aad.

Akhriste, maxaa kugu khasbaaya inaad ku seexato firaash aan nidaamsanayn ama goglanayn? maxaa kuu diidan inaad waqtigaaga ka goyso dhowr daqiiqo oo aad firaashkaaga ku hagaagsato?

Hadde noloshu waa sida firaashkaas, maxaad kugu khasbaaya inaad ku noolaato nolol tayo daran, nolol aan nuxur lahayn, nolol ku astaysan liidnimo, maxaad u noqotay mid had iyo

jeer ku marmarsiyooda duruufta? Haddii aadan adigu noloshaada gacantaada ku samaysan, yaad ka sugaysaa inuu kuu sameeyo?

Faa’iidada 5aad.

Dadka markay duruuf qabsato natiijada ka dhalanaysaa waxay noqon hadba go’aanka ay ka qaataan duruuftaas ku dhacday.

Alle wuxuu qur’aanka inooku sheegay dad ahaa kuwa naftooda dulmiyay, markii ay malaa’iktu nafta ka qaadaysay, ayay waxay bilaabbeen inay ku marmarsiyoodaan duruuftii ku habsatay oo ahayd inay ahaayeen kuwa dhulka ay ku nool yihiin lagu liido surkana looga taagan yahay. Markaas ayay malaa iktii ugu jawaabtay “soo dhulka ilaahay waasic maahan maxaad ugu haajiri weydeen oo uga tagi weydeen dhulka laydin ku liidaayo?”, Rabbi aayada wuxuu ku gabagabeeyay inay yihiin dadkaasi kuwa hoygoodu noqonaayo naarta jahannama, marmarsiyahoodiinaka ma aqbalin.

قال الله تعالى: {إِنَّ الَّذِينَ تَوَفَّاهُمُ الْمَلَائِكَةُ ظَالِمِي أَنْفُسِهِمْ قَالُوا فِيمَ كُنْتُمْ قَالُوا كُنَّا مُسْتَضْعَفِينَ فِي الْأَرْضِ قَالُوا أَلَمْ تَكُنْ أَرْضُ اللَّهِ وَاسِعَةً فَتُهَاجِرُوا فِيهَا فَأُولَئِكَ مَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ وَسَاءَتْ مَصِيرًا * إِلَّا الْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ الرِّجَالِ وَالنِّسَاءِ وَالْوِلْدَانِ لَا يَسْتَطِيعُونَ حِيلَةً وَلَا يَهْتَدُونَ سَبِيلاً فَأُولَئِكَ عَسَى اللَّهُ أَنْ يَعْفُوَ عَنْهُمْ وَكَانَ اللَّهُ عَفُوًّا غَفُورًا} النساء: 97 – 98.

CAQAABADA 7AAD.

CURYAAMIYAASHA(HANJABIYAASHA).

Sheekadii Xiisadii xisaabta.

Waxaa jiray wiil, wiilkaasi wuxuu dhiganaayay jaamacad. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu wuxuu ku hurdooday xiisad dhexdeed xiisadaasina waxay ahayd xiisad xisaab ah. Wuxuu wiilkii ku soo kacay markii xiisadii dhamaatay qayladii iyo buuqii ardayda, markuu indhaha kala qaadayna wuxuu arkay laba masalo ama laylis oo uu Macallinku ku qoray sabuurada, isla markiiba wuxuu la booday qalinka iyo buuga isagoo raba inuu boobsiiyo oo qorto inta aysan ardaydu sabuurada tirtirin oo masaxin, wiilkii markuu qortay labadii masalo wuxu la'aaday guriga, markuu damcay inuu ka shaqeeyo wuxuu arkay inay yihiin laba masalo oo aad u adag, wuxuu muda la raftaba wuxuu ku guulaystay inuu ka shaqeeyo hal masalo, maalintii danbe markii la gaaray xiisadii Macallinka ayuu Macallinkii u geeyay masaladii uu ka shaqeeyay isagoo waliba u cududaaranaaya inuu ka shaqayn waayay midii kale, Macallinkii ayaa ku yiri " xiisadii ugu dameysey anigu wax waajibaad ah ama laylis ah idiinma dirin ", markaas ayaa ardaygii ku yiri :- Macallin labadaan masalo waxaan ka qortay sabuurada markaad noo soo gashay xiisadii ugu damaysay, markaas ayaa Macallinkii ku yri " labadaas masalo waxaan sabuurada ugu qoray ardaydaan u sheegaayay in aan la xallin karrin qof ka shaqayn karana uusan jirin ", markaas ayuu ku yiri ardaygii :- hade Macallin hal mid ayaanba ka shaqeeyay tan kalena laga yaabbe in aan ka shaqeeyo haddii aan dadaal dheeraada ku bixiyo . markaas ayaa Macallinkii yaabay oo uu qaadan waayay labadii masalo mid ka mid ah ayaa arday ka shaqeeyay.

Akhriste, waxaa jira dad hadalkoodu sunta abeesada ka daran yahay, dad har iyo habeen u taagan inay dadka dadaalaaya han jabiyaan, dad shaqadoodu tahay inay qodax ku beeraan waddada guulaystayaashu marayaan, dad caqabad ku ah hormarka bulshooyin kooda.

Tusaale ahaan, waa dad haddii aad fikrad ula tagto ku han jabinaaya ama kugu jeesjeesaaya, waa dad haddii aad la kulanto adigoo hididiilo weyn xanbaarsan kula degaya sidii qof aan dabaal aqoon oo idinkoo badda ku jira ku qabsaday dabadeedna hoos kuula tiinbaday.

Khabiir ku takhasusay cilmi nafsiga ayaa wuxuu inoo cadaynayaa in ilmuhu intuu yar yahay, uu maqlo 148000 oo kelmado hanjabina, meeshuu ka maqlaayo 400 oo kelmadood oo niyad dhis ah.

Baddanaa inta ilmaheenu inaka maqlo ma samayn kartid, ma gaarikartid, ma noqon kartid iwm.

Liiska (-) iyo liiska (+).

Waxaa jirey wiil dhallin yara ah oo macallinkiisa ka dalbaday inuu la taliyo, oo kala taliyo qofkuu la saaxiibaayo iyo qofka aanu la saaxiibayn, macallinkii wuxuu kula ta liyay inuu samaysto laba liis oo uu dadka ku kala qoranaayo, una bixiyo liiska dadka (-) iyo liiska dadka (+), wuxuuna ku yiri: qof kasta oo erey niyad jab ah ku dhaha liiska (-) geli, qofkasta oo niyada kuu dhisa, hadal wanaagsan oo hankaaga kor u qaadaaya kugu dhaha fadlan geli liiska (+).

Imisa jeer ayaad ka istaagtay hormar aad diintaada ku samayn lahayd, hadal ay ku dhaheen dadka wax curyaamiya sababtiis? Badanaa inaad joojisey shaqo aad haysatay, hanjabin darteed! Imisa ayaad ka fariisatay hormar aad hiigsanaysay, hadal ku hanjabiyay awgiis? Imisa jeer ayaad niyad jab xooggan aad dareentay, fariin gurracan awgeed?

Bal dadka qaarkood waxay noqdeen kuwa ka eega mustaqbalka inta xun, oo markaad la fariisato ay roobka kaaga dhigayaan fariimo iyo kelmado xanbaarsan niyad jab.

Dadkaas khatarta ay leeyihiin maahan mid ku eg naftooda kaliya, ee waxay khatartoodu ku fidaysaa bulshada sida dabku ugu fido xashiishka ama cawska maalin dabeyl xoogle dhacayso.

Talaabooyinka aad iskaga ilaalin karto hanjabiyaasha.

Akhriste, maadaama dadka nocaas oo kale ah ay jiraan, waxaan kuu soo gudbin, talaabooyin aad kaga gaashaaman kartid dharbaaxooyinka kaaga imaanaaya dhankooda.

Tallaabada 1aad.

Fadlan ka fogow dadka noocaas oo kale ah, la fariisigooda iyo la sheekaysigoodaba, ishana ku hay dardaarankii Nabiga (NNKH) uu yiri: saaxiibka xun iyo midka fiican waxay la mid yihiin sida bir tumaha iyo cadar iibiyaha, tumaalka birta tuma markaad la fariisato, waxaad ka helaysaa in dharku kaa gubto ama aad hawo xun oo naqaska kugu xirto, waa sidaas oo kale dadka niyad jabiyaasha ah, inay kula haraan oo hoos kuula dagaan maahane faa’iido ka heli maysid.

Tallaabada 2aad

Fadlan ka dhega la oow farriimahooda hanjabinta ah.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa tartan galay koox Rah ah, barta loo tartamaayo waxay ahayd midkii ugu hor kora birta fiideeda, tartankii markuu bilawday ayaa waxaa meesha soo buuxiyay Rah aad iyo aad u fara badan oo u yimi inay daawadaan tartanka socda dhiiri gelintana ka qeyb qaataan, waxay ordaanba waxaa bilaabatay inay kala haraan oo qeybi daal dartiis u harto, waxaa isku soo haray shan xabbo, shantaasoo ay ka buuxday firfircooni iyo himmad sare, xaalku markuu halkaas maraayo ayaa taageerayaashii bilabbeen inay ku dhawaaqaan ereyadaan soo socda " ma'awoodi kartaan, magaari kartaan, suurtagal maahan inaad fuushaan birta fiideeda…….. waayo waa bir aad iyo aad u dheer".

Shantii soo hartay afar ka mid ah waxaa saameeyay hadalkii taageerayaasha ee ahaa inaysan awoodi karin inay dusha uga baxaan birtaan dheer.

Waxaa ku soo haray tartankii hal Rah kaa soo sii watay oradkiisii, gabagabadii halkii Rah ayaa dusha uga baxay birtii dheerayd ee loo tartamaayay, halkaasuuna ku guulaystay.

Dhammaan Rahii ayaa iskugu yimi kii guulaystay, iyagoo raba inay ogaadaan, meeshuu ka keenay xoogan iyo firfircoonidaan.

Ugu damayntii waxay ogaadeen Rahii inuu ahaa mid dhegala oo aan maqlayn fariimihii xanbaarsanaa hanjabka ee ay ku celcelinayeen taageerayaashu.

Haddaba, haddii aad rabto inaad noloshaan ku guulaysato, fadlan dhegaha ka furayso ereyada kaaga imaanaya dadka caadadoodu tahay inay hanjabiyaan khayrkood.

Tallaabada 3aad.

Fadlan haw ogolaan inay farriimahaasi qalbigaaga galaan.

Markii Nabi Muuse Alle amray inuu qoomkiisa ka xeeyo habeenimo, subaxdii ayuu fircoon ka war helay goortaas ayuu raacdeeyay ilaa uu bada ku gaaray.

Qoomkii Nabi Muuse markay arkeen in badii hortooda tahay fircoona gadaashooda yahay, ayay af iyo laba daan yeereen oo ku dhaheen Nabi Muuse **"war Muusow waanala hayaa".**

Akhriste, bal u fiirso, mawqifka la taagan yahay, ereyada ay dadku ku dhawaaqayaan iyo jawaabta uu bixiyay Nabi Muuse! wuxuu yiri isagoo ay ka buuxdo kalsooni iyo himmad sare *"maya … Rabbi ayaa ila jira oo i hagaaya"*.

CAQABADA 8AAD.

WANAAG SAADSIGA (OPTIMISM) IYO XUMAAN SAADSIGA (PESSIMISM).

Akhriste, wanaag saadsiga iyo xumaan saadsiga saamayn weyn ayay ku leeyihiin, hab dhaqanka qofka, caafimaadkiisa nafsi ahaan iyo jir ahaanba.

Akhriste, qofka ku astaysan wanaag saadsi, waxaa lagu yaqaanaa inuu yahay mid had iyo jeer Alle ka fila inuu meel wanaagsan gaynaayo guulaystayaashana ku daraayo.

Wanaag saadsigu wuxuu qofka ka ilaaliyaa inay dhibaatooyinka ku dhacaya ay ku keenaan ama ku reeban quusasho iyo niyad jab.

Wanaag saadsigu wuxuu ku gaarsiinayaa in aad Rabbi ku kalsoonaato, wuxuu kaa dhigayaa inaad noqoto mid Alle ku xiran oo aakhiro u shaqaysta, wuxuu kaa dhigayaa inaad noqoto mid arka yoolkiisa, haddii caqabado ka horyimaadaan, wuxuu ku siinayaa dhiiranaan iyo kalsooni aad naftaada ku qabto, si aad uga gudubto caqabadahaas.

Wanaag saadsigu, waa astaanta lagu yaqaan halyayada, guulaystayaasha, mu'muniinta.

Wanaagsaadsigu wuxuu kugu abuurayaa inaad yeelato hididiilooyin, waxaad ka helaysa firfircooni aad shaqadaada ku qabsato.

Wanaag saadsigu wuxuu cabbirayaa nolosha inta fiican.

Dhanka kale haddii aan fiirino, xumaansaadsigu waxaan oran karaa waa midka Soomaali tusi waayay khayraadka dalkooda, waa midka ay dhallin yaradeenii iyo wax garadkeenii ay badda ugu dhammaanayaan iyagoo nolol ka maqan baadi goobaaya, waa midka keenay in qofka Soomaaliga ah ee dalka gudihiisa ku nool u arko inuu xabsi ku jiro oo uu mar uun rajeynaayo sidii uga bixi lahaa xabsigan dhibaatada badan.

Waa midka keenay in dad badan oo gudaha Soomaaliya shaqo ku haystay, ay ka doortaan tahriib iyo yurub qaxooti ka noqo. Akhriste mar kale bal u fiirso, qof shaqo haysta ayaa qaxootinimo dooranaya, niyad jab iyo xumaansaadsi hareereeyay dartiis.

Waa midka keenay in Soomaali badan gaarto heer ay ka quustaan in dalkoodii aanu mar danbe kor u hin qanayn, in aanu dharbaaxooyinkii ku dhacay ka soo kabanayn, waa midka keenay in Soomaali badan u arkaan inay sharaftu ku jirto inuu ku noolaado dal shisheeye.

Waa midka keenay in Soomaali badan u aragto, inay ka dhigan tahay Soomaaliya oo lagu noolaado dib dhac iyo asaagaa ka har, waa midka keenay in Soomaalida qurbaha ku nool isku habaaraan “Soomaaliya lagaa soo wac”.

CALAACALKII DALKA SOOMAALIYA.

Xumaan saadsigu wuxuu keenay, in dalkeenii uu calaacal u diro bulshada Soomaaliyeed, calaacal iyo tiiraanyo uu ku cabbiraayo dareenkiisa.

Wuxuuna calaacalkiisa ku yiri: -

1.Maxaa iiga tahriibaysaa soomaahi dalkii hawada macaanaa ee khayraadka sharafta badnaa?

2.Maxaad iiga tahriibaysaa mashaqo ayaad iga weyday ?.
3- maxaad iiga tahriibaysaa madal shisheeye ayaad iga dooratay ?.
6- maxaan galabsaday oo aad ii xoortay oo iiga dhigtay meel qashin qub ah oo inta xun lagu daadiyo ?.
7- maxaad inaad iga xamaalato uga faanaysaa oo xamaaliga dal shisheeye ugu farxaysaa waliba adigoo ka shaqeeya shaqooyin aad ka faanto markaa aniga igu nooshahay ?.
8- maxaad wadooyinkayga u nadiifin weyday intaad dal kale wadooyinkiisa u nadiifinaysid adigoo shilimaad ku dhimo ah qaadanaaya ?.
9 - maxaad uga shaqayn waday hormarkayga oo iiga dhigi weyday dalka adduunka ugu quruxda badan ?.
11- maxaad ugu tafaxaydan wayday saan ku noqon lahaa dalka loo soo tahriibo , ee kaadida loo soo cabbo baddana loo soo jibaaxo, paasapoorkiisuna uu adduunka igu qaalisan yahay ?.
12- maxa murugtu kuu hareeraysaa markaad igu nooshahay, oo farxad iyo reyreyn kaaga badataa markii jaanis dhoof ku soo baxo ?
14- masaxare lamadagaan ah ayaan ahay oo meel aad iga beerato ayaad iga weyday ?.
15- soo maahi dalka uu ku nool yahay 1/4 geela adduunka ?.
16- ma bad aad ka jilaabato ayaad iga weyday ? Soo maahi dalka aad xili kasta baddiisa ka jilaaban karto ?.
17- ma batrool iyo acadam ayaad iga weyday ? Soo ma ogid in aan buuxo, maxaa ku rafaadiyay baad la soo baxdo si'aad faqriga uga baxdo ?
18- soo maahi dalka afrika ugu badda dheer ?.
19- soo maahi dalka adduunka dhan isha ku hayo oo ay iskugu soo habar wacdeen, booska aan ku aalo dartiis ?.
20- maxaan kaa hagraday oo aad iiga cararaysaa ? ….
Fadlan fadlan,,, fadlan …. Iisoo noqo yuusan nabsi ku qabsane … Igana soo gaar dadka i hagar daaminaaya ee iga dhigay inaan noqdo dal laga cararo …….

Laakiin waxaa is waydiin leh, ma dhici kartaa inaynu niyad jabkaas inaku habsaday u baddalo farxad iyo hormar aan horey loo arag oo aan dalkeena hormarrino? Ma jiraan dad dhibaatooyinkii soo foodsaaray u noqdeen sahay iyo saad ay karaar ka qaataan, si ay

naftooda iyo dalalkoodaba u hormariyaan? ma dhici kartaa inaynu dharbaaxooyinka inaku dhacaaya inoo noqdaan dhiiranaan iyo in aan adduunkan wax fiican ku soo kordhino?

Haddaba, jawaabtu waa haa !!! waxaanna isku dayayaa in aan kuu soo gudbiyo dhawr tusaale oo arrintaan tusinaaya.

Tusaalaha 1aad (Samaynta qalinka).

Lewis waterman, waa ninka curiyay ama hal abuuray qalinka aan maanta isticmaalno, waxaana ku kalifay inuu geed dheer iyo mid gaaban u koro siduu ku samayn lahaa qalin khadiisu ku dhex jirto oo aysan khadu ka daadanayn, waxaa jirtay maalin maalmaha ka mid ah ayuu wuxuu rabay in loo saxiixo shaqo uu muda badan raadinaayay dhibaato badan usoo maray, markii uu waraaqihii soo diyaarsaday, saxiixii ugu dambeeyay ee shaqada loogu ogalaan lahaa uu ka dhiman yahay keliya, ayaa khadii wax lagu qoraayay kaga daadatay warqadii shaqada loogu saxiixi lahaa, taasna waxay keentay inuu mar labaad soo bilaabo siduu u helilahaa waraaqda shaqada si loogu saxiixo, laakiin nasiib darro intuu ku maqnaa waraaqihii ayaa qof kale yimi oo shaqadii loo saxiixay, halkaasuuna ku waayay shaqadii uu raadinaayay.

Markaas ayuu naftiisa ku yiri, si aysan mar danbe kuugu dhicin arrintan oo kale, waa inaad curisaa oo hal abuurtaa qalin aysan khadu ka dadanayn, halkaasuuna ku sameeyay qalinka aan maanta isticmaalayno.

Waxaa is weydiinleh, hadduu niyad jabilahaa, magiciisa maanta ma noqon lahaa mid aan buuggan ku xusno? Markii qalin la sheegaba magiciisa mala sheegi lahaa?

Waxaan filayaa in aan joogno xilligii aynu niyad jabkaan u baddali lahayn hormar iyo farxad.

Tusaalaha 2aad (Samaynta khadka Barille).

Lewis Baraille, wuxuu ahaa fanaan faransiis ah, isagoo shaqadiisii meel fiican u marayso ayuu indha belay, musiibadaani waxay ku xanbaartay inuu hal abuuro hab ay dadka indhoolaha ah wax u qori karaan, hal abuur u sahlaaya in indhoolayashu la mid noqdaan dadka indhaha leh, run ahaantiina waa uu ku guulaystay oo maanta hal a buurkiisii ayay indhoolayaashii ku doogsadeen.

Tusaalaha 3aad (Samaynta Nalka).

Tomas Eddison, isagoo ku jira hal abuurkiisii oo rabay inuu sameeyo nal, ayaa waxaa dhacday in hooyadiis xanuunsatay una baahatay inay qallin gasho, laakiin nasiib darro dakhtarkii uma suurtagelin inuu habeenimo qaliinka sameeyo, waayo iftiin majiro waxayna noqotay inuu ilaa subaxnimada u dib dhigo.

Tomas markuu arkay in hooyadiis u dhiman karto nal la’aan, ayuu hoosta ka xariiqay sidii ku gaari lahaa samaynta layr la ifsado habeenkii, ugu damayntiina waa tuu ku guulaystay.
Akhriste, tusaalayaashaasi waxay ina barayaan inaynu ka soo kaban karno dhibaatooyinka dalkeena ku habsaday una badali karno hormar iyo farxad.

Hididiilo aan ficil la socon.

Akhriste, waxaynu soo gaarnay gabagabada buugga, waxaanna filayaa inay inoo hartay, sidaynu horey talaabo ugu qaadi lahayn, talooyinka buugga ku qoranna aynu u dhaqan gelin lahayn, waayo haddii aynaan ficil ku darrin hididiilaha iyo hanka inaku jira, wax qiima ah ma yeelanaayo.

Sheeko kooban:

Bisad ayaa waxay soo weerartay sadex shinbirood, sadexdii shinbirood mid waxay ku fikirtay inay cararto, labana waxay go'aansadeen inay cararaan, su'aal: bisadii imisa shinbirood ayay cuntay?

Jawab: sadexdiiba waa cuntay! waayo mida ku fikirtay iyo labada go'aansadayba, midna ficil kuma darrin …. waa fikir iyo go'aan aan ficil la socon.

Akhriste, roob lama sugo cirka oo aan daruur lahayn, dalagna lama dhowro beerid la'aan.

Qofka wahsiga badan, waxaa astaan lagu yaqaano ah hididiilo aan ficil la socon.

Waxaa hubaal ah inaanu gaarayn sharaf qof hurdada badsaday, waxaa xaqiiqo ah inaysan isku meel tagay qof dadaalay iyo qof aan dadaalin.

Soo arrin la yaableh maahan inaad rajaynayso ka mid noqoshada guulaystayaasha waddadoodiina aadan hayn! yaysan inaka hoos bixin in duufaanta soo rogmanaysaa ay markii hore ahayd dhibco isku tagay.

Wakaalada hawada (dayax gacmeedyada) ee dalka maraykanka, gantaalkii ugu horeeyay ee ay cirka u dirto dhererkiisu wuxuu ahaa 15cm, baaxada uu ku fadhiyayna waxay ahayd 7.5cm, waxayna ka sameysneyd alwaax, xayrna waxay uga dhigeen saabuun si uu isku liso oo u boodo, tijaabidaasi waxay ahayd 80 sano ka hor, laakiin maanta halkee joogaan?

Akhriste, soo ma aynu joogno xilligii aynu hididiilooyinkeena u baddalilahayn ficil.

Ereyga qoraaga buugga.

Walaalkayga qiimaha badanoow: -

a.Ogow inaad tahay qof muhiim ah oo aan laga maarmin. Fadlan u dhaqan sidii qof muhiim ah.

b.Ogow inaad tahay sidaad naftaada ka aaminsan tahay in ka badan.

c.Ogow guushu waa shay la samayn karo. Hortaana ay dad sameeyeen. Haddii aad raacdo waddadii dadkaas guusha sameeyay, adna waad samayn kartaa oo waad guulaysansan kartaa.

d.Ogow lax waliba shilalkay is dhigtaa lagu qalaa.

e.Ogow buuggan mawduuca uu ku saabsan yahay waa midka kala soocay guulaystayaasha iyo ma guulaystayaasha.

f.Mawduuca buuggani waa jaranjarooyinka horumarka.

g.Mawduuca Buuggan wuxuu jawaab u yahay su’aasha oranaysa “maxey dadku u horumareen, anna halkii u taaganahay?”.

CODASI!

Akhriste, Buuggan adigaan kuu qoray, adigaan kuu diyaarshay, adigaan kuu soo gelbiyay, adigaan kuu soo agaasimay ee fadlan iga gudoon waadna mahadsan tahay, hana iga ilaawin inaad Rabbi ii weydiiso inuu Buuggan noqdo midkii aan Alle la hortagilahaa jannadiisana aan ku mutaanay lahaa.

TIXRAAC BUUGA.

a.Quraanka kariimka ah.

b.Axadiista nebiga (NNKH).

c.Xakamee Noloshaada (Ibraahim Fiqi).

d.Maareynta Wakhtiga (Ibraahim Fiqi).

e.Maareynta Wakhtiga (Daariq Suweydaan).

f.Haweenay ka bilan dhigeed (Kariim shaadali).

g.Su’aalo ……. kala hor marri noloshaada (Daariq Suweydaan).

h.Himiladaada Hano

i.Astaamaha qofka hanka sare leh (Cabdifataax cajab).

j.Caqabadaha hormarka. (Yaasir alxasmi).

k.Marxaladaha hanjabiyaasha. (Dr Jamaal Yusuf).